# QEYBTA 1aad

# AQOONTA GUUD

# ISBADELKA CIMILADA IYO SAAMEYNTA AY KU LEEDAHAY BADDA

## HORDHAC

Cimilo waa isbedelka ku yimaada marxaladaha kuleylka, qaboowga, huurka, cadaadiska cirka, dabeylaha iyo roobka ee deegaan ka mid ah dhulku yeesho mudo aad u dheer. Sida caadiga ah, Cimiladu waa ka duwan tahay cimilo xiliyeed, sababtoo ah jawigu waa marxalada isbedel ee ku dhaca waxyaabaha aan kor ku soo xusnay ee wakhti gaaban, sida todobaad, bil ama sanad oo kaliya. Joogga ama dhigga, loolaka (Deegaanka) ayaa xaddidaaya cimilada ay meeli leedahay. Sidoo kale waxaa saameyn xooggan keena biyaha badaha iyo noocyada kale ee biyaha (sida harooyinka, webiyada IWM) ee deegaan leeyahay. Tusaale ahaan, dhulka joogga sareeya ee buuroleyda ah way ka qabowdahay kana dabayl badan tahay deegaanada xeebaha ah ee jooggoodu hooseeyo.

Isbeddelka cimilada waxaan tixraaceynaa **Isbeddelka Adduunka ee muddada-dheer ee Cimilada Dhulka**. Ereygan waxaa la isticmaaley sanadkii 1988 koox saynisyahanno ah oo soo gabagabeeyay in sii deynta qiiqa kaarboonka ay dardar galineyso isbedelka cimilada dabiiciga ah, ugana sii dareyso.

Hay'adda Cunnada iyo Beeraha (FAO) ee Qaramada Midoobay (UN) waxay ku qeexday isbeddelka cimilada "Isbeddel ku yimaada xaaladda cimilada oo lagu aqoonsan karo isbedellada celceliska ama kala duwanaanshaha cimilo meeleedka, taasina waxay isa soo badaleysay muddo dheer oo ka badan 30 sanno ugu yaraan. Isbeddelka cimiladu waa isbeddel ku yimaadda qaabka cimilo xiliyeedka ah ee gobolka. Labaatankii sano ee la soo dhaafay, heerkulku korbuu u kacay dhulka iyo baddaba. Isbeddelkani waxa uu saamaynayaa cimillada maxalliga ah ee adduunka oo dhan. Culimada seynisku waxay qabaan in isbeddelka cimilad aan aheyn mid dabeeca ah laakiin ay keentay ama sabatay hawlaha horuumerineed ee bini-aadanku keenay.

Isbeddelka cimilada waxaa loola jeedaa isbedellada mustaqbalka fog ee cimilada ee dhacaya tobannaan sano, qarniyo ama ka badan. Waxaa sababa gaasaska lagu siidaayo hawada marka la gubo shidaal, dhuxusha iyo waliba gaaska dabiiciga ah, kuwaasoo sameeya aqalka cagaaran (green house gas), marka ay galaan hawada dhaw, ka dibna waxaa ka dhasha dhul kuleylka ama diirimaadka.

**Bad waa maxay?**

Baddu waa biyo dhanaan oo ay ku badan tahay maadada cusbadu, baddu qiyaas ahaan waxay ku fadhidaa in ka badan 70% oogada sare ee Dhulka. Baddu waxay hoy iyo meel ay cunto ka cunaan u

tahay kalluunka, naasleyda, dhir badeedka, shimbiraha iyo kuwa kale oo badan oo kamid ah noolaha badda.

Meeraha dhulku wuxuu leeyahay hal badweyn oo kaliya, inkastoo cilmi-baarayaasha oceanographer’s iyo wadamada adduunku ay juquraafi ahaan u qeybiyeen ilaa Shan (5) qeybood oo kala ah: Atlantic, Pacific, Indian, Arctic iyo Southern Oceans. Laga soo bilaabo qarnigii 20-aad, qaar ka mid ah cilmi-baarayaasha baddu waxay calaamadiyeen badaha ku xeeran Antarctica ee Badweynta Koonfureed, ayna wadamada qaar u aqoonsadeen badda shanaad, sidaan ay ku noqdeen Shan (5) badood.

Biyaha baddu qiyaas ahaan waxay ka yihiin boqolkiiba 97% biyaha adduunka, sidaa awgeed, baddu waxay saameyn wayn ku leedahay cimilada, heerkulka, iyo sahayda cuntada dadka iyo noolaha kale, waliba waa meesha ay iska gudbaan agabyada kala duwen ee cuntadu ka mid tahay.

**Badda iyo Isbedalka Cimilada.**

Baddu waxay door muhiim ah ka qaadataa nidaamka cimilada dhulka, waxeyna muddo dheer qeyb ka aheyd wax ka qabashada isbeddelka cimilada, sidaa darted, baddu waxay nuugtaa ilaa 90% kulaylka soo gaara dhulka korkiisa ee sababeen bini’aadanku markii ay ku siidaayeen karboon badan hawada, waxa kale oo ka dhashay kuleylka caalamiga ah (global warming), waxa kale oo

ay qaadataa baddu 30% kaarboonka hawada lagu sii'daayo, sida ay sheegeen guddiga caalamiga ah ee Isbeddelka Cimiladu. Si kastaba ha ahaatee baddu waxay awood u leedahay inay hayso ama keydiso kaasoo hoos udhiga kulaylka caalamiga ah.

Baddu door weyn bey ku leedahay la' qabsiga isbedelka cimilada, habka ugu muhiimsan ee ay baddu wax uga tarto la qabsiga waa iyada oo loo marayo hab-nololeedyada xeebaha oo kor loo qaado ilana ilaaaliyo ama la beero geedaha ka baxa xeebaha iyo baddaba, sida mangroves, coral reefs, iyo cawska badda.

Geedka Mangrove ku kaliya ma taageero noolaha, laakiin sidoo kale wuxuu xoojiyaa la' qabsiga saameynta isbeddelka cimilada ee bulshada xeebaha ku nool, Cilmi-baadhis cusub oo laga sameeyay Bangladesh ayaa ku qiyaastay in duufaanada xoogga leh geedka mangroves ka ee xeebaha ka baxaa uu hoos u dhigi karo heerarka biyaha dabeyshu wado ee xeebaha inta u dhaxaysa 4 iyo 16.5 centimitir, ayakoo waliba hoos u dhigaaya xawaaraha dabeesha iyo biyaha ay sababtay duufaanada loo yaqano cyclones-ka hoos u dhigi karto xawaaraha ilaa 29%.

**Isbedelka Cimilada saameynta uu ku leeyahay Badda.**

Cimiladu waa mid ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee sababa isbeddelada xagga berriga, xeebaha, iyo baddaba. Hadaba Isbeddel kasta oo ku yimaada deegaan badeedka wuxuu saameyn baxaad leh ku leeyahay dhammaan noolaha badda, dhir iyo

xayawaanba. Isbeddelku cimilladu waxay keeni karaan iney isbeddalaan maadooyinkii ay ka koobnaayeen biyuhu waa midi badato ama yaraado sidea hoos u dhacaa (PH) ka biyah oo ay noqdaan ayciid ama ay ku badato maada karboon (carbondioxide) oo sameysay acid, kana saarto meesha maadadii birta, waxaa kale oo isbeddalku keeni karaa kuleyl ka sareeya heerkii caadiga ahaa ee biyaha badda.

Baddu waxay muddo dheer qaadatay culayska ugu badan ee saamaynta kulaylka caalamiga ah ee bini'aadamku sababey, sida ay sheegtay hey'adda Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada. Isbedelladani waxay ugu dambeyntii sababeen saameyn joogto ah oo ku timid kala duwanaanshaha noolaha badda, iyo nolosha iyo waliba hab-nololeedka bulshooyinka xeebaha deggan oo ay ku jiraan ku dhawaad 680 milyan oo qof oo ku nool dhulka hoose ee xeebaha, ku dhawaad 2 bilyan oo ku nool kala bar magaalooyinka waaweyn ee adduunka ee xeebaha ah. Isbaddelka cimilladu wuxuu saameeyey ku dhawaad kala badh dadka adduunka (3.3 bilyan) oo ku tiirsan kalluunka badda, iyo ku dhawaad 60 milyan oo qof oo ka shaqeeya kalluumaysiga iyo wax soosaarka xagga badaha.


Isbadelka cimilladu waa khater weyn oo ku wajahan badqabka badda, waxeyna keeni kaartaa in deegaan badeedka isbaddel ku yimaado, ayna sababi karto kuwan hoos ku qoran;

1. Heerkulka oo sare u kaca

2. Acidka badda
3. Sare u kaca heerka badda
4. Silsiladda cuntada badda oo burburtay.

**Sare u kaca Heerkulka Badda**

Kor u kaca heerka baddu wuu kordhay tobannaankii sano ee la soo dhaafay waxaana sababay in uu dhalaaley barafka ee gobollada cirifka adduunka. Xogtii u dambaysay ee Hey'adda Saadaasha Hawada Adduunka ayaa muujinaysa in celceliska heerka badda ee caalamiga ah uu gaadhay heer cusub oo sare u kaca sanadkii 2021, isaga oo celcelis ahaan kor u kacay 4.5 millimitir muddada u dhaxeysay 2013 ilaa 2021. Ayada oo ay weheliso duufaannada kulaylaha ah ee sii kordhaya, heerka badda ayaa sii kordhinaaya dhacdooyinka ba'an sida duufaannada dilaaga ah iyo khataraha xeebaha sida daadadka, nabaad guurka iyo dhul go'ah, kuwaas oo hadda la saadaaliyay in ay ku sii badanayaan meelo badan oo dhaca dhul ka kuleylaha.




Waa sawir muujinaaya kor ukaca biyaha badda 30kii sano ee u danbeeyey.

Intaa waxaa dheer, Guddiga Isbaheysiga ee Isbeddelka Cimilada (IPCC) ayaa sheegay in dhowr gobol, sida galbeedka Tropical Pacific, Koonfur-galbeed ee Pacific, Waqooyiga Baasifigga, Koonfur-galbeed ee Badweynta Hindiya iyo Koonfurta Atlantic, ay wajahayaan heer korukac oo dhaqso ah. Kuleylka badan ee baddu wuxuu kor uqaadaa biyaha, sababi kartana duufaano xoog badan inay ka dhashaan, masiibana ku noqon karta dadka degan xeebaha.

**Acid**

Baddu waxay nuugtaa qiyaastii 30% kaarboon dioxide (CO2) ee lagu sii daayo hawada (atmosphere). Marka heerarka hawada ee karboonku ay sare u kacdo, kaas oo ay sababtay wax soosaarka horuumerineed ee bini'aadamku wadaan, sida gubista shidaalka iyo xaalufinta dhirta, sidaa owgeed waxaa kale oo kordhaaya nuugida badda ee kaarboon laba ogsaydhka. Karboonku waxaa ka dhalaneysa falgal kiimiko ah, waxaana sameysmaya Acid, hadaba habkani waxa uu saamayn fog ku leeyahay badda iyo makhluuqa ku nool.




Isbedelkaas wuxuu saameynayaa isku dhiska kimiko ee badda,waxeyna hoos u dhigeysaa (PH) ka, waxay dhab ahaantii ka dhigan tahay ku dhawaad 30% korodhka Acid badda. Tani waxay leedahay saameyn la taaban karo oo ku wajahan kiimikada biyaha badda iyo nidaamka deegaanka ee ku tiirsan. Si kastaba ha'ahaate kororka Acidka ayaa halis ku ah gaar ahaan noolaha qolofleyda (shellfishka) oo qalfoofkooda ka sameysta Calcium Carbonate. Isbeddelada kimisteriga badweynta ayaa sidoo kale saameyn kara hab-dhaqanka noolaha yar yar, ayadoo daraasado la sameeyey muujinayaan hoos u dhac ku socda PH (Power of Hydrogen) biyaha badda (Dhanaanka).

**Silsiladda cuntada badda oo burburta**

Nolosha badda Ayadoo markii horaba heysatay cadaadis uga yimid kalluumeysiga xad-dhaafka ah iyo wasakheynta badda, waxaa dhib ka soo gaartaa laga bilaabo kalluunka waaweyn ilaa xaywaanka yar yar ee cyanobacteria ee ku nool badda- ayaa sidoo kale isbeddelka cimiladu uu saameyn weyn ku keenay, hadaba markay baddu heer kulkeedu kor u kaco iyo qulqulka biyuhuba waxay saameyn kuleeyihin noolaha. Daraasad la sameeyay sannadkii hore ayaa sheegtay in biyaha kulul ay hoos u dhigeen tirada guud ee kalluunka ku nool badda. Badda ugu daran ee ay saamaysay ayaa ahayd badda Japan, iyadoo 35% hoos u dhac ku yimid baaxadda kalluumeysiga, kaddib markii u isbadelay

diirimaadka biyaha dhanaan, xaga kalena cilmi baaristu waxey muujisey in Badda Bariga Shiinaha ay hoos u dhacday 8%.

Heerkulka badda oo sare u kaca wuxuu kordhiyaa halista burburinta hab-nololeedyada badda iyo xeebaha, wakhtigaan la joogo waxaa la arkay isbeddelo baahsan, oo ay ku jiraan waxyeelo soo gaartay Shaccabiga (coral reefs) iyo mangroveska ee taageera nolosha badda, iyo noocyada kalluunka guur guura oo u guuraya meelaha qabow. Qiyaastii ugu dambeysay ee Hay'adda Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka ee Qaramada Midoobay (UNESCO) ayaa ka digaysa in ka badan kala bar noocyada badda ee adduunka laga yaabo inay qarka u saaran yihiin inay dabar go'aan 2100. Kororka Heerkulka 1.1° C ee hadda wakhtigan ayaa lagu qiyaasay 60% hab-nololeedyada badda ee adduunka ay hoos dhacdey, hadaba Kulaylka heerka 1.5°C waxa uu khatar ku yahay in uu burburiyo 70% ilaa 90% shacaabiga (coral reefs) ee ku badan dhulka kuleylaha, iyo walibe kororka 2°C waxa ay la macno tahay 100% iney burburaan dhamaan coral reefs iyo noolihii ku dul noolaa, side ka muuqata jaantus kan hoose.










Waa sawir muujinaaya heer kulka baddu marka kor u kaco sida u saameyo noolaha badda

Heshiiska Paris ee isbadelka cimilada ayaa si cad loogu sheegay Faqrada 13, kaasoo daboolaya muhiimadda ay leedahay ilaalinta kala duwanaanshaha noole iyo hab-nololeedyada, iyo in badda lagu daro qeexitaankeeda hab-nololeedyada deegaanka.

## Shirkii COP27 ee Sharma Alsheekh ee Isbeddelka Cimillada

Talooyinkii Shirka Qeybaha Qaramada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada (COP27), kaas oo ahaa kii ugu horreeyay ee lahaa Maalin gaar ah oo loogu talagalay Beeraha oo gacan ka geysata saddex meelood meel (1/3) qiiqa hawada wasakheeyey ($CO_2$), waana in ay beeruhu noqodaa qayb muhiim ah oo ka mid ah xalka hoos u dhigidda heerkulka.

Waxyaabaha kale ee lagaga dhawaaqay COP27 waxaa ka mid ahaa:

- Fulinta Ajendaha La qabsiga isbeddelka Cimillada ee Sharma Al-Sheekh
- Tallaabo ku saabsan La qabsiga Biya yarida iyo fatahaadaha ee Hindisaha Adkeysiga (AWARe)
- La falgelidda Hindisaha Suuqa Kaarboonka Afrika (ACMI)
- Ololaha dardargelinta la qabsiga Caymiska
- Dib-u-cusboonaysiinta Iskaashiga Caalamiga ah ee Isbeddelka Cimillada

Nuxurka qodobadaan kasoo baxay Shirka Sharma Sheekh ee COP27 waa la qabsiga Isbeddelka Cimillada oo ku taagan:

- Adkeysiga
- La qabsiga iyo
- Maareyntooda

# Tixraaca

1. https://www.un.org/en/climatechange/science/climate-issues/ocean
2. Levin, L.A., "Manifestation, Drivers, and Emergence of Open Ocean Deoxygenation", Annual Review of Marine Science, Vol.10, January 2018, pp. 229-260.
3. https://chinadialogueocean.net/en/climate/15101-how-does-climate-change-affect-the-ocean/
4. https://oceanfdn.org/ocean-and-climate-change/
5. UNFCCC. 2020. Policy brief on the ocean: Scaling up adaptation actions and co-operation to build climate resilience of the ocean, coastal areas and ecosystems. Bonn: UNFCCC. Available at https://unfccc.int/documents/266434.
6. https://unfccc.int/node/201712.
7. https://www.un.org/en/global-issues/climate-change

# BADWEYNTA HINDIYA.

## I. Maqaaalka 1aad : Badweynta Hindiya.

1. **QEEXID:** badweynta (maanyada) hindiya waxay ka mid tahay 5(shanta) badweyn ee dunida kajirta oo kala ah:
   a. Badweynta Deggan (Pacific).
   b. Badweynta Atlantica.
   c. Badweynta Hindiya.
   d. Badweynta Barafka ah ee Waqooyi.
   e. Badweynta Barafka ah ee Koonfur.

Badweyn kasta waxay leedahay Bado lagu xisaabiyo oo Bedkooda lagu qiyaasay 3% Bedka Badweynayaasha aan soo xusnay, amaba iska dheh biyaha Badaha oo ah 360 Milyan Km laba jibbaaran X 3% = 11 Milyan $km^2$.

Badweynta Hindiya waa baaxadda 3aad ee Biyaha dunida oo la eg 75/360=21% (Shan meel hal meel) waxay u dhigantaa qaarad Afrika (2.5) laba jeer iyo bar.

**Xuduudaha Badweynta Hindiya(B.W.H).**

Waxay dhacdaa B.W.H Bariga Qaaradda Afrika Galbeedka Badweynta Deggan, waqooyiga Badweynta Barafka ah ee Koonfurta iyo koonfurta Qaaradda Aasiya (Asia). Xagga Xarriiqmaha Joqoraafiga waxay xuduudda BWH ay noqoneysaa sidaan:

1. GALBEED: Dhigta (Longtitude) =$20^o$ W.
2. Bari: Dhigta (Longtitude) = $55^o$ E.
3. Waqooyi: Lool (Latitude) = $30^o$ N.
4. Koonfur: Lool (Latitude) = $40^o$ S.

**Badaha muhiimka ah ee B.W.HINDIYA.**

1. Waqooyi galbeed: Khalijka CADAN iyo BADDA CAS.
2. Waqooyi: Badda Carbeed iyo Khalijka Carabta.
3. Waqooyi Bari: Khalijka Bangal iyo Badda ANDAMAN.

**Ciriiriyadaha.**

1. Baab AL-Mandab…. Albaabka Badda CAS.
2. Hormuz… Albaabka khalijka Carabta.
3. Malaka (Malacea)- Albaabka Bari ee B.W.H.
4. Sanda oo u dhexeeya Jasiiradaha Sumatera iyo JAWA (Indonesia).
5. Kanaalka Mozimbique.

**Jasiiradaha waaweyn iyo kuwa dowladaha ah:**

**Galbeedka B.W.H.**

1. Jasiiraddaha Madagaskar oo ka baaxad weyn J.F.S (Dowlad)
2. J.Seychles (Dowlad).
3. J.Komoros (Dowlad)
4. J. Mauritius (Dowlad).
5. JR.Union (Dowlad)

**Dhexbartanka B.W.H.**

1. J. Maldives (Dowlad)
2. J.Ghagos:

**Bariga B.W.H.**

1. J.Indonesia (Dowlad).

**Waqooyi Bari**

1. J. Srilanka (Dowlad).

**Waqooyi Galbeed**

1) J .Masiira (Cummaan-Oman).
2) J.Suqatara (Somalia?)
3) J. Dahlak (Eriterea)

**Dowladaha kulaala Badweynta Hindiya.**

1. **W. Galbeed:** Masar, Sudan, Eriterea, Jabuuti, Falastiin (Israa'iil), Urdun, Sacuudi (qeybtiisa Galbeed), Yaman = 7 Dowladood,
2. Galbeed: Somaaliya, Kenya, Tanzania, Mozambique Koonfur Africa, Madagascar, Komoros, Seychelis, Mauritious, Reunion= 10 Dowladood.
3. **Bari:** Australia, Indonesia, Singabore, Malaysia, Thailand, Burma = 6 Dowladood.
4. **Woqooyi:** Bangladesh, Hindia, Srilanka, Maldeves, Pakistan, Iran, Cumaan, Imaaradka, Sucudiya, Baxreyn, Qatar, Kuweyt, Ciraaq, 13 Dowladood.

Wadarta Dowladaha BWH waa = 36 Dowladood oo tirada dadkoodu ay tahay 2.9 Bilyan (41% Dadka Dunida).

Tirakoobkaan waxaan ka soo xigannay **worldometers.info** oo la sameeyey Sanadka 2022.

# Dowladaha ugu tirada badan ee kulaala Badweynta Hindiya (BWH) oo u kala horeeya sida ay u kala tiro badan yihiin:

| Asia | | | |
|---|---|---|---|
| **No** | **Country** | **Capital** | **Population** |
| 1 | India | New Delhi | 1.38 Billion |
| 2 | Indonesia | Jakarta | 273.5 Million |
| 3 | Pakistan | Islamabad | 220.9 Million |
| 4 | Bangladesh | Dhaka | 164.7 Million |
| 6 | Iran | Tehran | 83.99 Million |
| 7 | Thailand | Bangkok | 70.2 Million |

| Africa | | | |
|---|---|---|---|
| **No** | **Country** | **Capital** | **Population** |
| 5 | Masar | Qahira | 102.3 Million |
| 8 | Tanzania | DARUSALAM | 63.6 Million |
| 9 | South Africa | Cape Town | 59.3 Million |
| 10 | Kenya | Nairobi | 56.43 Million |
| | | | **Total of 10 Countries: 2.5 Billion** |

# Dowladaha kulaala Badweynta India (BWH)

| Galbeed | Country | Population | Total |
|---|---|---|---|
| 1 | Sudan | 46.2 million (2022) | |
| 2 | Eritrea | 3.7 million (2022) | |
| 3 | Djibouti | 1 Million (2022) | |
| 4 | Somalia | 16.9 Million (2022) | |
| 5 | Mozambique | 33.23 Million (2022) | **Total 5 Countries**<br>**101 million** |

| Bari | country | Population | Total |
|---|---|---|---|
| 1 | Australia | 25.9 (2022) | |
| 2 | Singapore | 5.64 million (2022) | |
| 3 | Malaysia | 32.7 million (2022) | |
| 4 | Burma | 55.23 million (2022) | **Total 4 Countries**<br>**119.5 million** |

| **Waqooyi** | **Country** | **Population** | **Total** |
|---|---|---|---|
| 1 | Srilanka | 21.62 million (2022) | |
| 2 | Oman | 5.4 million (2022) | |
| 3 | Emirate | 10.21 million (2022) | |
| 4 | Saudi | 36.04 million (2022) | |
| 5 | Bahrain | 1.8349 million (2022) | |
| 6 | Qatar | 3 million (2022) | |
| 7 | Kuwait | 4.412.9 million (2022) | |
| 8 | Iraq | 42.3 million (2022) | **Total 8 Countries**<br>**125 Million** |

| **Waqooyi Galbeed** | **Country** | **Population** | **Total** |
|---|---|---|---|
| 1 | Yemen | 31.31 million (2022) | |
| 2 | Jordan | 10 million (2022) | |
| 3 | Flastin (Israel) | 5.4 million (2022 ) | |
| | | | **Total 3 Countries**<br>**56 Million** |

| | |
|---|---|
| **Wadarta 26ka waddan= 401 Million** | **Wadarta 30 ka dowladood waa = 2.9 Billion** |

**<u>Dowladaha Jaziiradaha ah</u>**

| NO | Country | Population | Total |
|---|---|---|---|
| 1 | Madagascar | 29 Million (2022) | |
| 2 | Mauritius | 1.3 Million (2022) | |
| 3 | Seychelles | 1 Million (2022) | |
| 4 | Comoros | 915 thousand (2022) | |
| 5 | Reunion | 911 thousand (2022) | |
| 6 | Maldives | 564 thousand (2022) | |
| | | | **Grand Total 34 MILLION** |

*Wadarta 26da wadan ee ka soo haray 10kii tirada badnaa waxaa ku nool* = <u>401 Milyan</u>.

Haddaba wadarta guud ee Dadka Dowladaha **36da** ah ee kulaala B.W Hindiya waa **2.934 Bilyan** = <u>40%</u> Dadweynaha Dunida (2022).

Inta badan dowladahaan kulaala Badweynta Hindiya, kuwa Asianka ah, kuwa Yurub ah iyo Amerika ka yimaada ayaa Boob ku haya gurashada kalluunka Badaheenna.

Sidaas awgeed waa in J.F.S ay qaadato Siyaasad waxtar ah oo lagu badbaadin karo kheyraadkeenna Nool iyo kan kaleba; waxaana ka mid noqon kara siyaasaddaas:

1. Fududeynta fasaxa kalluumeysiga,
2. Gacansiinta kalluumeysatadeenna (Bixin Dooman, shabaag, Qaboojiyayaal, suuqraadin… iwm),
3. Ciidanka Badda oo la dhiso,

4. Dowladda Dhexe iyo D.Goboleedyada oo yeesha Habraac mideysan ee maamulka Badaheenna iwm.

## CIMILLADA BADWEYNTA HINDIYA

Dhulbaruhu wuxuu maraa dhexbartankeeda, sidaas awgeed waxay ku dhacdaa dhulka kuleylaha ee u dhexeeya labada soodimood ee kala ah 23,5 N & 23,5 S. Sidaas awgeed cimillada Badweyntaan waa isla kuwa dhulalka dhaca Dhinacyada Dhulbaraha.

- Xagga Kuleylka: waa sarreeya (Barafna maba noqoto)
- Xagga Dabeysha waxaa ugu muhiimsan labada joogtada ah (Monsoon) ee Waqooyi Bari iyo Koonfur Galbeed.
- Qulqulka Biyaha (Marine Current), waxaa saameyn weyn ku leh kuleylka oo sabab u ah cufnaanta Hawada oo ayana sabab u ah Dabeysha iyo Jahadeeda, dabadeedna qulqulka.

Arrimahaan waa kuwo laga wada warqabo, laakin Qodobka mudan in la is dul taago waa Qulqulka Biyaha oo saameyn weyn ku leh Dhaqdhaqaaqa Biyaha Badda, Noolaha iyo Badmaridda intaba.

Qulqullada Badweynta Hindiya, guud ahaan, waxaa dhaqaajiya Dabeysha joogtada ah, taasoo keentay inay isku jiho u socdaan. Waqtiga Deyrta iyo Jiilaalka waxaa socda DABEYSHA joogtada ah (Monsoonka) ee Waqooyi-Bari oo u socoto Koonfur-Galbeed, muddadaan Qulqulka Biyaha Badwenta

Hindiya wuxuu ka soo shubmayaa Badda Carbeed, asagoo ku feer socda Xeebaha Soomaaliya iyo Xeebaha Kenya iyo Tanzaniya, dabadeed wuxuu u leexanayaa xagga Bari ($2^0$-$5^0$,S).

Guga iyo Xagaaaga waxaa soconeysa Dabeysha Koonfur-Galbeed oo u riixeysa qulqulka biyaha xagga Waq-Bari, ayadoo ku socota Jahada Caksiga u ah tii Deyrta.

Ballaca qulqulku wuxuu gaari karaa Boqollaal Mile oo Badda ah, hoosna sidoo kale, sidaas awgeed Baaxadda qulqulku aad ayey u weyn tahay, waxaaba la dhihi karaa, Biyihii Badda intooda badan qulqulka ayey ku jiraan.

Haddii aan eegno Kheyraadka nool ee Badda, waa noocyada kala duwan ee Kalluunkee, waxay u kala baxaan xagga Degganaanta: kuwo Guri ah oo isaga nool Degaankooda, iyo kuwo soc-socda, kuwaan dambe oo ah kuwa ugu qiimaha badan ama ugu waaweyn Kalluunka guud ahaan sida Libaax badeedka oo Noocyo badan, Tuunada oo ISIRRO badan iyo qoysaska Sardiinka..IWM. kuwaan guurguura waxaa dhaqdhaqaajinaya waa qulqulka badda, sidoo kale ayaa qulqulka u sisidaa quudka noolaha badda, waxaa kale oo qulqulka baddu uu Qaboojiyaa Biyaha Badda, haddii uu ka yimaado meel qaboob, haddii uu ka yimaado meel kululna waa kuleyliyaa badda, hase yeeshee isbeddelka kuleyka ee Badweynta Hindiya, ma weyna.

Badweynta Hindiya waxaa deris la ah Badweynta BARAFKA ah ee Koonfur oo haddii kuleylkeedu bato uu dhalaali karo BARAFKEEDA sarena u qaadi karo biyaha Badweynta Hindiya, taasoo khatar ku ah in baddu ku soo fatahdo xeebaha oy ay maasheyso Xeebaha Muqdisho meelo ayey Baddu ka soo gashay, wax bandanna waan ka dignay, waxana loo baahan yahay in xoogaa darbi (1 mitir ah) laga dhiso meelaha qaarkood.

ALLE AH NAGA BADBAADIYO.

# Sooyaalka Badmaridda

## Waa maxay Badmarid?

Badmariddu waa fan iyo saynis lagu xaddido booska (halka) uu markabku ku sugan yahay waqgti kasta, sida Diyaarad ama Baabuur, laguna hago meel (Jid) gaar ah, waqtiga safarkana loo helo, haseyeeshee qalabkii lagu heli lahaa laguna ilaalin lahaa wakhtiga ayaa isbedelay sidii ay badmareenadu uga gudbeen badaha oo horumar ayuu sameeyey.

1700kii, badmareenada Yurub iyo Map sammeeyayaasha (Mapmakers) waxay ogaayeen kaliya kala bar oogada dhulka iyada oo lahayn wax faah faahin ah.

Ummadihii iska soo horjeeday waxay sahminta badaha ku bixiyeen hanti badan, ayagoo adeegsanayey awood iyo haybad.

Si safarka badan looga dhigo mid badbaado leh oo dhaqsi badan, dadku waxay ku qasbanaadeen inay horumariyaan qalabka Badmaridda sida Markabka, qalabka hagidda iyo xaddididda waqtiga…iwm.

## Caqabadaha Badmaridda Badda.

Socdaalka badaha dunida waxaa ka jira khataro waaweyn. Xoogag dabiici ah oo ka baxsan awoodda aadanaha ayaa xukuma hirarka iyo qulqulka badda oo sida badan ku xiran cimillada.

**Cimallada.**

Xaddididda booska iyo ilaalinta jihada xaaladaha caadiga ah waxay ku xiran tahay aqoonta dabaylaha iyo qulqulka badda.

Badaha kacsan iyo cimillada xun waxay halis geliyaan shaqaalaha maraakiibta, waxayna kharribaan qorshayaasha safarka iyo hagidda wanaagsan.

**Masaafad (Distance).**

Badmaridda biyaha qotada dheer (Deep water) waxay u baahan tahay xirfado kala duwan, marka loo eego tan "xeebaha" (Coastal Navigation) oo adeegsata astaamo muuqaal ah. Laakiin Badweynta furan, badmaaxiintu waxay ku tiirsan yihiin nooca xisaabinta ee loo yaqaan (Dead Reckoning) sida qiyaasidda boos cusub oo ku salaysan ogaanshaha booska ugu dambeeya ee markabka, xawaaraha, iyo jihada Jaantusyada (chartmarks) iyo Jihooyinka socdaallada kale.

Aqoon la'aanta dhul-badeedka baaxadda leh ee badweynta iyo xeebaha ayaa lagu yaqaan socdaalka ilaa qarnigii 19 –aad.

**Saxnaanta Qalabka.**

Helitaanka loolka (latitude) waxa ay noqotay mid sahlan markii la soo saaray aaladaha xadidda, laakiin hubinta loolka waxa ay ahayd mid adag ilaa la soo saaro saacad badeed (Istidlap) u qalanta howshan.

Joogga sare iyo cirka daruurta leh ayaa saameeyay akhrinta qalabka adeegsada Ileyska qorraxda iyo xiddigaha, oo ku adag xaaladaha caadiga ah, iyo kuwa aad u adag.

**Socodka saacad la'aanta Badmaxiinta (Mariners)** waxay gaareen waaaya-aragnimo cajiib ah oo xagga sahminta iyagoo isticmaalaya kaliya qalabka ugu fudud.

Ka hor intaysan saacadaha (Qalabka) saxda ah ee maraakiibtu caadi noqon, badmaaxiinta reer Yurub waxay si taxadar leh u adeegsan jireen ileyska Qorraxda, Dayaxa, iyo xiddigaha.

Iyagoo og khataraha, badmaaxiintu waxay ku tiirsanaayeen qalabkooda, aqoontooda iyo mararka qaarkood xitaa nasiibka waqtiga ay ku safrayaan badaha khatarta ah ee adduunka.

Bad-mareennadii hore waxay sameeyeen dadaal ay ku jaan-gooyaan xeebaha fog iyo sifooyinka badda xitaa iyagoon aqoon baahsan lahayn. Jaantusyada badda ee ugu horreeyey Yurub waxay ahaayeen tilmaamo sahlan oo xeebaha saameeya si loogu xoojiyo qoraal ama tilmaamo afka ah.

Waxay markii dambe soo saareen qalab horumarsan oo ku salaysan xiddigiska (Astronomy - ga iyo xisaabta (Mathmatics).

**Dhibaatada xaddididda Dhigta (Longitude).**

Khatarta ugu weyn ee badmaaxinta waxay ahayd inay waddada ka dhumaan. Sannadkii 1700, xaddididda loolka badda waxay

ahayd mid joogto ah oo sax ah. Laakin helista Digita waxay ahayd inta badan mid mala awaal ah.

Culumada qaar waxay qabeen in jawaabta loo heli karo xaddididda dhigta in ay ku jirto adeegsiga xiddigaha. Qaar kale waxay la ahayd in xalku yahay helitaan saacad wanaagsan oo badda ku habboon, laakiin saacaddaas oo kale may jirin.

Ka dib markii ay soo baxeen fikrado cusub iyo jiilal badan kadib, labadaba waxay suurto galiyeen helitaan saacad iyo sextant (Aalad) wanaagsan. Qalabkaani waxuu wax ka beddelay boos-helidda Badda.

**Gunaanad.**

Ku dhex safarka badaha adduunka waxuu noqday mid caadi ah oo dalalka dunida wax badan u fududeysay, iyadoo aad ka dheregsan tahay heerarka kala duwan oo khatarta leh ee laga soo maray arrintaas Badmaridda ah.

# Jaziirad-Kooxeedka (Archipelago) Suqadara


Jasiiradahaan kooxda ah waxay dhacaan Woqooyi-Bari (NE) ee Raas Caseyr, waxayna kala yihiin:-

1. Jasiiradda Soqadara oo ugu weyn dhacdana dhinaca Woqooyi Bari, xuddunteeduna tahay = ($12^0$ 30`N, $53^0$ 55`E).

   Jaziiraddaani waxay leedahay qaab Ukun-leydii, labadeeda madax ay ku beegan yihiin Bari & Galbeed isuna jiraan 132 km (71 miil), ballacuna yahay 50 km (27 miil).

   Waxayna ka dhan tahay kooxda 95%, bed ahaan, taa macnadeedu waxay tahay in Bedkeedu yahay qiyaas ahaan 3606 $km^2$; halka jaziiradaha kale ay yihiin bed ahaan = 190 $km^2$ (wadarta bedka Kooxdu = 3796 $km^2$. (1113 miil sq), oo ah kaliya dhulka Jasiiradaha.

   Jaziiradda Suqadara waxay xigtaa Woqooyiga Kooxda Jasiiradaha, waxayna ka fog tahay xeebta Yaman (oy hadda raacsan tahay) 220 N.M. (407 km); halka ay ka fog tahay xeebta Soomaaliya 100 miil kaliya, jasiiradda Suqadara waa la deggan yahay hadda.




*Jasiiradda Suqadara*

2. Jasiiradda Cabdalla Kuuri waa jasiirad yar oo xigta dhinaca Koonfur ee Kooxdaan, aadna ugu dhow Soomaaliya (Raas Caseyr) (50 N.M) oo keliya (93 km), waana la deggan yahay (Xuddun: $12^0$ 11` N, $52^0$ 15` E.





Jasiiradda Cabdalla Kuuri

3. Jasiiradda kale ee iska yar waa kuwo loo yaqaan Walaalaha, waxayna ka kooban yihiin laba jasiiro oo yar yar kalana ah Samha & Darsa.
   a) Samha ($12^0$ 08` N, $53^0$ 03` E) waa jasiirad yar oo Galbeed ka xigta walaasheed Darsa 14 miil, Xuddunta labaduna waxay ka fog tahay Jasiiradda C. Kuuri 35 miil Bari.

      Jasiiraddaan Samha Dad yar ayaa deggan.
   b) Jasiiradda Darsa ($12^0$07`N, $53^0$17`E) Bariga Xeebta Soomaaliya, waxaana ku nool Doolli badan.

      Hase yeesee, jasiiraddaan iyo laba kale oo aad u yar yar waxaan ku nool shimbiro-badeed fara badan.




*Jasiiradaha Walaalaha ee Samha & Darsa.*

Waxaa aad muhiim u ah in la xusiisto in Jasiirado-Kooxeedka Suqadara ay ka fog yihiin Xeebta Yaman 220 N.M halka ay u jiraan xeebta Soomaaliya 50 N.M. oo keliya.

**Maamulka iyo Dadka**

Jasiiradahaani waxay hoos tagaan waqtigaan Dowladda Yaman; weliba gobolka Xadarmout, maamulka jasiiradahaan wuxuu ka kooban yahay 2 degmo oo kala ah:-

1) Deg. Xadibuu oo dhacda Woqooyi-Bari ee J. Suqadara, waxaana deggan 32,000 qof.
2) Deg. Qalansiyah oo koobta dhinaca Galbeed ee Suqadara iyo C.Kuuri, waxaana deggan 18,000 qof oy ku jiraan 450 qof oo degta C.Kuuri iyo 100 qof oo deggan Samha.

Haddaba wadarta dadka dega Jasiirado-Kooxeedka (Archipelago) Suqadara waa 50,000 qof (2014).

Dadka deggan Jasiiradahaan waxay kala yihiin:-

Maharo, Soomaali, Hindi iyo Afrikaan, waxaa la ogyahay in qabiilka Maharo uu deggan yahay Dalka Soomaaliya; waxay ii sheegeen odayaal ka mid ah Soomaalida degta agagaarka Raas Casyer in gabdhohooda lagu soo arooso Jasiiradahaas, arrintaan oy Ab ka Ab soo socotay sida ay ii sheegeen.

Halkaan waxaa laga dareemi karaa in Soomaaliya ay la laheyd jasiiradahaan xiriir ka qoto dheer kan Yaman oo ka fog 407 km dhul ahaan.

## Dhaqaalaha Jasiiradahaan

Dadka deggan Jasiiradahaani waxay ku howlan yihiin: xoolo dhaqashada sida geela, lo'da iyo ariga.

Tacabka beeraha, gaar ahaan timirta iyo tubaakada, sidoo kale dabashada kalluunka.

Waxayna dhoofiyaan Timirta, Tubaakada Subagga lo'da iyo Kallunka iyo xoogaa dhirta iyo xabkaha la isku daaweeyo sida xabatu sowdaha iyo sibirka IWM.

Waxaa jira airport ku dhacda Galbeedka magaalada Xadibu; sidoo kale deked ku taalla xeebta Koonfur-Bari ee J. Suqadara.

## Taariikhda Jasiiradaha Suqadara

Jasiiradahaan taariikh ahaan waxay mar kasta gacanta u geli jirtay ciddii xoog leh: Giriiggii, Roomaankii, Masaaridii hore, Turki, Burtuqeys oo ugu dambeyntii ka guuray Suqadara 1511 CD (Ciise Dabadiis), dabadeed waxaa sheeganayey xukunkeeda Shuyuukh (Boqorro) ku nooleed xeebta J. Carbeed ilaa 1834tii oo Ingiriisku qabsaday, ugu dambeytii Ingiriisku wuxuu ku wareejiyey Koonfurta Yaman 1967dii, dabadeedna waxay ka mid noqotey Yamanta Midowday 1990kii.

Waxaa la leeyahay Jasiiradahaan waxaa laga helaa dhir iyo xayawaan aan meel kale laga heli karin, sidaas awgeed, waxay ku tirisay UNESCO meelaha loo qoondeynayo in la ilaaliyo, lana xanaaneeyo.

**F.G.**

D.F.S waxay u gudbisay Q.M. 30/06/2014 in Jaziirada kooxeedka SUQATARA inay ka mid tahay xuduuda biyaha Soomaaliyeed in kasta Dowlada Yemen ay u gudbisay Q.M. maalin ka dib inay ayadana sheeganeyso Jaziirada.

# QEYBTA 2AAD

# CILMIBAARISTA

# URURKA TUUNADA EE BADWEYNTA HINDIYA (IOTC)

## Horudhac:

Kalluunka waxaa uu kamid yahay kheyraadka ugu muhiimsan wadamada leh badaha, wuxuuna u kala baxaa noocyo kala duwan, waxaana kamid ah kuwa ugu muhiimsan nooca loo yaqaan TUUNA, Dalka Soomaaliya wuxuu kamid yahay wadamada laga helo TUUNAHA ugu badan, haddaba si loo ilaaliyo loona maareeyo TUUNAHA waxaa bilowday in la samaysto iskaashi, si gaar wadamada kulaala Badweynta Hindiya waxaa loo dhisay Urur ka shaqeeye arrimahaas oo lagu magacaabo URURKA TUNAHA EE BADWEYNTA HINDIYA (IOTC).

## Taariikhda Ururka IOTC:

Ururka IOTC waxaa la aasaasay 1993dii, kalfadhigii 105aad ee Golaha Ururka Qaramada Midoobay ee Cunnada Iyo Beeraha (FAO), sida ku xusan Qodobka 14aad ee Dastuurka Ururka Cunnada Iyo Beeraha (FAO), waxaa kaloo ku xusan in Ururka Tunaha ee Badweynta Hindiya (IOTC) xubnihiisa ay qaadan karaan go\aano ku salaysan maaraynta TUUNAHA, Kheyraadka shabaha iyo nidaam deegaameedka (ecosystem) saamaynta ku leh, kuna qasbaya dhammaan xubnaha iyo kuwa la shaqeeya Ururka ee aan qeybta ka ahayn ururka inay raacaan go’aanadaas.

Heshiiskii lagu dhisay (IOTC) waxaa la saxiixay 25kii November 1993dii, wuxuuna dhaqangalay markay kusoo biirtay dhinac qandaraasle ah oo loo aqoonsaday xubintii 10aad 27kii March 1996dii, Xeer-nidaamiyayaashii maaliyadeed ee IOTC waxa lagu ansixiyay kalfadhigii gaarka ahaa ee koowaad ee Ururka, oo lagu qabtay Rome Maarso 21-24, 1997 iyo shuruudaha habraacyada ee IOTC oo lagu ansixiyay kalfadhigii labaad ee gaarka ahaa, ee lagu qabtay Fiktooriya, Seychelles 22-25 Sebtembar, 1997. Qeybaha shuruudaha habraacyada waxaa dib u eegis lagu sameeyay June 2014kii iyo May 2022kii. Ayadoo la raacayo go'aankii ay gaareen xubnaha kalfadhigii koowaad, ayaa waxaa lagu dhisay Xoghaynta magaalada Fiktooriya ee Jamhuuriyada Seyshelles, waxayna howlgashay Jannaayo 1998dii.

**Ku Biiristii Soomaaliya IOTC**

Soomaaliya ayaa noqotay xubnihiii ugu dambeeyay ee ku biira Ururka Tuunaha Ee Badweynta Hindiya (IOTC) 9kii Janaayo 2014kii, waana Urur Dowli ah oo qaabilsan maareynta kalluumaysiga TUUNAHA iyo noocyada shabaha ee badweynta hindiya, iyo ilaalinta nidaamka deegaan ee la xiriira.

Soomaaliya oo dhacda Geeska Afrika lehna xeeb dheer ayaa ku biirtay IOTC ayadoo kamid noqotay xubno gaaraya 30 dowladood iyo shirkado oo iskaashanaya, ayadoo loo marayo maamulka ku haboon, xoojinta ilaalinta iyo adeegsiga ugu haboon

ee keydadka hoos imaanaya Ururkaan iyo dhiirogelinta horumarka waara ee kalluumaysiga ku salaysan keydadkaas.

Ururka Cunnada Iyo Beeraha ee (FAO) ayaa fududeeyay inay Soomaaliya ku biirto Ururka (IOTC), ayadoo gudanaysa waajibkeeda ka saaran horumarinta iyo ilaalinta kheyraadka kalluumaysiga aduunka.

Kaaliyaha Agaasimaha Guud ee (FAO) ee gobolka Afrika, Bukar Tijani ayaa ku tilmaamay tallaabadan mid horumar leh wuxuuna yiri: " Gelitaanka Soomaaliya ee (IOTC) waa tallaabo weyn oo lagu xaqiijinayo waarista noocyada Tunaha ee Badweynta Hindiya, laakiin sidoo kale waa tallaabo geesinimo leh oo si buuxda loogu ciribtirayo burcad-badeedda aafeeyey badweynta tan iyo 2009."

**<u>Muhiimadda Ay Leedahay Ka mid Noqoshada IOTC:</u>**

- Waxay u suurtagelinaysaa Soomaaliya inay ka faa'iidaysato maraakiibta Tuna ee ajnabiga ah ee ku shaqeeya shatiga EEZ-keeda
- Waxay u suurtagelinaysaa Soomaaliya inay horumariso maraakiibteeda kalluumaysiga oo ay gacan ka geysato kheyraadka waare ee TUUNAHA.
- Waxay ka caawinaysaa ka hortagga kalluumaysiga sharcidarrada ah ee halakeeyay kheyraadkeeda, ayadoo Xubnaha ku jira IOTC ay kawada shaqaynayaan arintaas.

- Waxay ka caawinaysaa ka hortaga xaaladah khatarta ku ah kalluunka tunaha iyo noocyada shabaha, iyo sidoo kale nidaamka deegaanka la xiriira, taas oo ah sababaha ugu muhiimsan ee loo dhisay Ururka IOTC.
- Waxay u suuragelinaysaa inay qeyb ka noqoto shirarka, tababarada iyo cilmibaarista la smaynayo iyo go'aan ka gaarista arrimaha la xiriira hanaanka ilaalinta iyo maaraynta TUUNAHA.

## Gunaanad:

IOTC waa Urur Caalami ah oo ka shaqeeya ilaalinta iyo maaraymta TUUNAHA iyo noocyada shabaha, sidoo kale ilaalinta nidaam deegaameedka (Ecosystem) xiriirka la leh. Sidaa kor ku soo xusnay Soomaaliya muhiim bay u tahay inay ku biirto Ururkan balse waxaa muuqata inaysan Dowladdu ka faa'idaysan soona saarin shuruuc wafaqsan oo la xiriirta qodobada aan soo sheegnay si ay ula jaanqaado wadamada iyo xubnaha qeybta ka ah Ururkan.

Waxaa muhiim ah in wasaaradaha qaabilsan howshan ay soo saaraan shuruuc la jaanqaadikarta hannaanka ilaalinta iyo maaraynta si guud kalluumaysiga si gaar ahna TUUNAHA IYO NOOCYADIISA.

**Xigasho:**

Ururka Tunaha Ee Badweynta Hindiya (IOTC).
https://iotc.org/about-iotc/basic-texts
Ururka Qaramada Midoobay ee Cunnada Iyo Beeraha (FAO)
https://www.fao.org/somalia/news/detail-events/fr/c/241095/

# BII'ADDA & QASHINKA MAGAALADA XAMAR

waxa halkaan idiinkugu soo gudbinaynaa u kuurgelidda xaaladda Qashinka Gobalka Banadir. Waxaan ku kala bixinay Safar Cilmibaariseed (Goobta Qashinka lagu gubo ee Koonfureed) ahna Xeebta Jazeera, dabadeed Xeebta Geel Liq, (Badda ku beegan kawanka malayga ee Dagmada Xamar Weyne), kawaanka xoolaha, iyo Goobta Waqooyi oo Qashinka lagu gubo ee Dagmada Karaan.

G/Banadir wuxuu la daala dhacayaa dhibaatoyin ka heysta xagga Qashinka , taasoo keentay in laga abaabulo laba (2) goobood ee qashinka lagu gubo ama lagu daadsho sida :-

- Koonfur: Xeebta Jaziira,
- Waqooyi: Deegaanka Gubadley,
- Xeebta Geel Liq agagaarka Kawaanka Malayga ee degmada Xamar weyne iyo
- Kawaanka xoolaha

**Sawirka 1aad**



Dagaalladii ahliga ahaa ka hor, xeebaha Banadir waxay lahaayeen dhul xeebeed ah 450 mitir sida ku cad sharciga Badda ee Dalka, oo leh dhir neecaw qabow leh, oo lagu ilaaliyo deegaan baddeedka, sidaas awgeed biyaha Badweyntu waxay ahaayeen buluug saafi ah (Nadiif), hase yeeshee hadda Xeebtii waxaa ku fidday dhismo Deegaan ah oo Badda saran qashinkooduna ku socdo Badda, sidoo kale Biyaha Musqulaha iyo Bulaacadaha.

**Sawirka 2aad**




Sawirkan wuxuu muujinayaa gaari taagan oo raba in uu ku daadsho qashin Rugta lagu gubo ee Xeebta Jasiira, waane Xeebtii Caanka ku ahayd bilicda qurxoon, dalxiiska & Dabaasha.

**Sawirka 3aad**




Sawirkaan wuxuu muujinayaa Xeebta Geel liq ee Degmada X/Weyne sida loogu shubayo Qashimada kala duduwan, sido kale waxaa halkaas ku socda Bulaacadaha iyo Musqulaha Degmada.

**Sawirka 4aad**



**Sawirka 5aad**





Sida ka muuqato sawirada 4aad & 5aad, baaxadii weynayd oo ay lahayd Xeebta Liido waxaa ceriiriyay darbiyo waaweyn oo gudaha xeebta soo galay waxaana meesha ka suulay dhirtii manguruufka ahayd iyo bacaadadii oo aas aas u ahaa dhowrista (Deegaan Badeedka).

**Sawirka 6aad**



Sawirka 6aad wuxuu muujinayaa Kawaanka Xoolaha oo dhiigoodu uu ku socdo Badda, Kaasoo khatar ku ah noolaha Badda.

**Sawirka 7aad**



Sida ka muuqato sawirka 7aad, waa goobta Waqooyi ee Qashinka lagu gubo ee Dagmada Kaaraan, Qashimo goobo goobo u kala yaalla, oo iyo la shiday wada holcaaya, kuwa wada qiiqaya, Shimbirana dul heehaabayaan, iyo katarabiilar isku walaaqayo.

- Meelaha aan soo marnay ee Qashinka Gobalka Banadir lagu gubo/lagu tuuro/lagu shubo waa arrin halis ku ah Caafimaadka Deegaanka.
- Hadii aan soo qaadano Qashinka badda lagu shubo oo ka kooban nuucyo baddan oo kiimikaalis ah (Sun ah) iyo dhiigga badda ku socda intuba waxay halis ku yihiin bedqabka caafimaad ee noolaha Badda & dadka adeegsanaya Xeebaha, gaar ahaan kuwa ku dabaasha.

- Haddii aan eegno Qashinka la gubayo wuxuu hawada galinayaa nuucyo ah gaasas kala duduwan oo hawada wasaqeynaaya oo leh raadkiisa caafimaad daro, waxaa saameentiisa sii kordhinaayo dabeesha iyo roobka.
- Hey'adda Cilmi baarista Badaha Soomaaliyeed waxay u soo jeedinaysaa dowladda in la magacaabo gudi ka kooban aqoon yahano ku xeer dheer Garashada dhibaatada ka imaan karta qashinka lagu shubaayo Badda iyo midka lagu gubaayo oo qiiqiisa hawada galaayo, si gudigu u soo jeediyo tala badbaadin karta deegaanka iyo dadka.

Mahadsanidiin.

# XAALADDA W.S.S KALLUUMEYSIGA MUQDISHOW BILIHII BADXIRANKA SANADKAAN 2022, KHASAARAHA, IYO SICIRKA KALLUUNKA.

Bilaha badxiranku, guud ahaan, waa muddada ay socoto Dabeysha mansoonka Koofur-Galbeed (April-Sept), gaar ahaan bilaha June-July. HADDABA HALKAAN waxaan ku soo koobeynaa Baaris ay sameysay waaxda kheyraadka nool ee Hay'adda Cilmi Baarista Badaha soomaaliyeed.

## BAARISTU WAXAY DANEYNEYSAY:

1. Dhibaatoyinka Naf & Maal (Dooman) ah ee dhacay waqtiga Badxiranka.
2. Waxsoosaarka (W.S.S) kalluunka ee waqtigaan.
3. Sicirka kalluunka isla waqtigaan.

## Dhacdooyinka.

1. 7/6/2022 Doon ayaa aadday Badda kalluumeysi awgiis, oo ay saarnaayeen Nakhuude & 2 Baxaari, laakin mowjadaha waaweyn ayaa geddiyey Doontii, Nakhuudihii wuu ku dhintay, meydkiisii wuxuu ku soo caariyay Beryo kadib xeebta Ceel Macaan, 25 km Waqooyiga Muqdisho, 2(labadii) Baxaari si diriq ah ayey ku soo gaareen xeebta, doontiina waa la waayey (iskaashatada DAN KULMIS ee xeebta liido ee Xamar).

Baaristu waxay caddeysay in kalluumeysatadu ay wax badan ka ogtahay khatarta badda kacsan ay ku keeni karto Naftooda iyo Doomankooda, laakiin dhibaato dhaqaale xumo ah oo ka jirta guryahooda awgeed ayey u biimeynayaan naftooda.

Dhacdadaan kuma aha xeebaha Muqdisho iyo (dalka intiisa kale) mid dhacdo, iyo labo ee waa wax tiro badan bilahaan.

Daraasadu waxay talo ku soo jedineysaa in iskaashatada loo abuuro SANDUUQ (Bank CC) oo waqtiga Baddu ay deggan tahay W.S.S kuna sarreeyo QAARAN, lagu uruuriyo si loogu fakado waqtiga BADDU KACDO, lana geli waayo W.S.S kuna yaraado.

2. 5/7/2022 waxaa ka baxday Xeebta CURUUBA ee Shingaani (Xamar) doon yar oo ay saarnaayeen 3(saddex) kalluumeysato ah, Baddii waxay dejisay Doontii, wax ka badbaadana ma jirin. Sababtuna & xalkuna waa kii hore aan ugu soo xusnay Qod-1.
3. Isla Bishii July waxaa Warshiikh (Tuulo dhacda Xeebta Waqooyiga ee Muqdisho 65km) in Doon weyn oo VOLVO ahayd mareysana meel u jirta Xeebta 20Miil la waayey ayada iyo wixii saarnaa Raq & Ruux toona, Dhacdadaan ayana Sababteedu waxay u badan tahay TAXADER xumi oo kaashata huriwaa ka yimid Baahi Guri (Qoys, Caruur---Waayeel). Xalkuna wuxuu noqon karaa kii Baaristu ay soo jeedisay oo ahaa Abuuris Sanduuq QAARAN(Qod.1).

4. 15/7/2022 Xeebta Kismaayo (Magaalo-Madaxda KMG ah ee D.G. Jubbaland) waxaa la soo sheegay in Doon yar oo ay saarnayeen 3(saddex) kalluumeysato ah ay Badda gashay oo Risqi u raadsatay, hase yeeshee Badda ayaa ku xumaatay; waana la waayey Doontii iyo Dadkii Saarnaa. Sababta iyo xalkuba waa kuwii aan soo xusnay.
5. Sanadkaan 2022 wuxuu ka duwunaa sanadihii ka horreeyey, sida cilmibaaristu ay qortay, waayo waxaa aad u badnaa khasaaraha Dhimashada kalluumeysatada oo Baddu ku kacday iyo xitaa kuwo Baddu iskala tagay oo hirarka xooggani ay ka dafeen xeebta oo la badbaadin wayey badda oo kacsan owgeed. Waxaa kale oo sanadkaan cusub Tirada badan ee Doomanka lagu waayey badda.

   Xalkuna waa in lagu shaqeeyo Taxadir Dadeed iyo Qaaran Dhaqaale.

**<u>W.S.S. oo hoos u dhaca waqtiga Badxiranka.</u>**

1. Mar haddii Baddii ay kacsan tahay oo doomankii kalluumeysigu ay ku adag tahay inay Badda galaan, way iska muuqataa in W.S.S. kalluunka aad uu hoos ugu dhacayo.
2. Waqtiga Badxiranku, kalluunka guurguura wuu ka haajiraa Xeebaha furan wuxuuna raadsadaa meel gabbaad ah u uku badbaado.
3. Hase yeeshee waxaa jira Kalluumaysato Biimo ah oo goosatay inay Risqi ka raadsato Badda ama ha lagu

dhinto ama ha laga badbaado. Baaristu waxay Daneysay W.S.S. kalluumeysatadaan Isbiimeysa.

a. Maalintii 18/7/2022 waxaa Badda aaday dhowr doon oo ah Fara-ku-tiris Biimo ah, waxayna keeneen suuqa Liido ee Cabdulcasiis Muqdisho Kalluun tiro yar oo isugu jira:-
   - SUCBAAN
   - SUMEYN
   - YUUMBI
b. Maalmihii 20-21/7/2022, waxaa xoogaa sare u kacday isku biimeynta Bad-gelidda, waxayna suuqa keeneen Noocyada kalluunkaan oo xoogaa tiro badan.
   - SHIIRAAN.
   - SUCBAAN.
   - WAYAAMBA.
   - SUMEYN.
   - LIBAAX.
   - YUUMBI
   - DHIIGLOW.
   - ARGOSATO.

Sida ay tilmaaameyso cilmibaaristu W.S.Ska yar waxaa sabab u ah:- Doomaanka oo aan Badda geli Karin iyo kalluunka oo u haajira meelo ammaan ah.

**Sicirka KALLUUNKA oo Kaca Waqtiga Badxiranka.**

Sida cilmibaaristu ay caddeysay, muddadaan Badxiranka ah, gaar ahaan Bisha July oo ugu Daran, in SICIRKA Kalluunka laga ogaan karo tuse (Sample) oo dhowr beri la qaado oo muujin karo xaaladda Sicirka Kalluunka ee Bishaan Luulyo iyo Bilaha la jaarka ah, sida Juun iyo Agosto; waxaana lagu soo koobay SHAXDAAN:

| L | Nooca Kalluunka | Sicir 1kg (US Dollar) |
|---|---|---|
| 1 | Kalluun | 10-12 |
| 2 | Argosto | 16-18 |

Wixii ka danbeeyey Todobaadkii 2aad ee Agosto Dooman badan ayaa badda aadayey oo ku dhow 100 (Boqol) Doon (Xeebaha Muqdisho)… waxayna keeneen Kalluun fiican oo hoos u dhigay sicirkii ilaa $9-10, dabadeed dabayaaqadii Agosto $7-8 Dollar 1kg kii, Aragostaduna ilaa 16 Dollar 1kg.

**FG:** soo koobidda Cilmibaaristaan waxaa sameeyey Prof Faarax Axmed Cumar Guddoomiyaha H.C.B.S, hase yeeshee Asalka Cilmibaaristaan Ballaaranayd waxaa diyaariyey ENG. CABBAAS NUUR MAHDI AG.Waaxda Kheyraadka Nool ee Badda ee H.C.B.S iyo tiimkiisa, waxaana u jeedinayaa baarayaashaan Ammaan iyo Bogaadin, waxaana u rajeynayaa guul.

# Nidaamkeennii hore kormeeridda Kheyraadkeenna Badeed.

Kheyraadka Baddaha Soomaliyeed wuu ballaaran yahay, laakiin BOOB ayaa lagu hayaa, waxaana la soo tibiyey inuu hoos u socdo oo dhowr nooc oo kalluun ah, weliba qaali ah, inay hoos uga degeen intii la ogolaay (Sustainability), gaar ahaana familka TUUNAHA iyo TUUNA u egtada. Haddaba, in Dowladda F.Somaliyeed ay bixiso Ruqsado Kulluumeysi waa ARRIN waxtar ah, sida aan u arkeyno, waayo waa in wax uun laga ceymiyo Xoolaheena Xaraashka ku jira. Haseyeeshe waxaan adkeyn lahayn in loo noqdo hirgelinta Nidaamkeennii hore ee lagu maamuli jiray Maraakiibta la siiyo fasaxa kalluumeysiga ee Biyaheenna (EEZ ka).

**Nidaamkaani wuxuu ahaa sidaa:**

1. In la saaro markab kasta oo la siiyay Ruqsad kullumeeysi kormeerayaal, gaaraya ugu yaraan 6 (Lix) kormeere oo kala shaqo duwan.
2. Lixda kormeere waxay ka kala imaanayaan hey'adaha soo socda;-
    a. Waa/da Dekadaha & G/Badda 2(labo).
    b. Was/da kulluumeysiga & Kh.Badda 2( labo).
    c. Ciidanka Badda & Difaaca Xeebaha 2(labo).

    Waa laga yabaa in Hey'ado kallena ay kormeerayaal soo diran jireen, sida NSS ta (NISA).

Kormeere kasta waxuu shaqeynayaan maalintii 12 Saac. (Habeen buuxa, ama maalin buuxda).

3. Maxay kala qabtaan kormeerayaashan:-

a) kuwa ka yimid Was/da Dekedaha & G/Badda waxay hubinayaan:-

- in markabka howshiisa ay ku siman yahay dhulkii (Biyihii) ugu qornaa warqadda fasaxa.
- haddii uu ka baxo meeshii loo cayimay, wuxuu xusuusinayaa Kaptanka Markabka, si uu isu saxo; haddii uu ka dhega adeego tusaalaha kormeeraha, kan danbo wuxuu durbadiiba u gudbinayaa wasaaradiisa, si looga qaato markabka tallaabada ku haboon.
- Haddii markabku soo galo biyaha Qaranka iyo Biyaha Xiga (24 Miil Badeed Xeebta), Biyahaas oo loo qorsheeyey in loo xiro kalluumeysatada Xeebaaleyda ah. Arrintu waxay gaari jirtay in fasaxa lagala noqdo markabkaas.
- in marka kalluumeystuhu uusan wax u dhimin (Dardarin) shacaabiga Badda oo ayaduna keeneyso in fasaxa lagala noqdo.

b) kormeerayaasha ka socda Was/da Kalluumeysiga, waxay hubinayaan:-

1. In markabku uu DABTO qaatana kaliya Nooca Kalluunka ee ugu qoran fasaxa.

2. Haddii uu qabto Markabku Kalluun ka duwan kii loo fasaxay, waa inuu BADDA ku celiyo, xataa haddii ay dhinteen.
3. Kalluunka aan la ogoleyn in la ugaarsado, sida QUBADA iyo NAASLEYDA waa inuu BADDA ku celiyo.
4. In kormeeruhu isha ku hayo in uusan badda ka kalluumeysan markab ku lambar (TARGO) ah Markabkaan.

Arrintaan iyo wixii la mid ah ayuu isha ku hayaa waana difaacayaa nidaamka Dalkiisa; wixii dheeraad ahna wuxuu la wadaagayaa wasaaraddiisa, sida badan ciddii ku kacda falalkaan gurracan waxaa laga qaada FASAXA.

c) Kormeerayaasha ka socda Ciidanka Badda waxay u taagan yihiin hubinta Qarannimada Dalka (Somali Sovereignty). Halka kormeerayaasha kale ay u joogaan ilaalinta Deegaanka iyo Kheyraadka.

Howlaha kormeerayaasha ka socda C.Badda & Difaaca Xeebaha waa:-

1. In la hubiyo in markabku uu u dhega nugul yahay tusaalooyinka kormeerayaasha oo dhan.
2. In la hubiyo in markabku uusan ku jirin BASAASNIMO ku wajahan DALKEENNA.

3. In la hubiyo in marku uusan gacansiineyn maraakiibta iyo Doomanka ku howlan howlaha sharcidarrada ah, sida GANACSIGA, MAANDOORIYAASHA, Hubka iyo Tahriibinta…iwm.
4. Iyo wax allaala iyo wixii khatar ku ah Nabadgelyada Dalka iyo Howlaha Dalku uusan ogoleyn.

Arrimahaan haddii markabka laga celin waayo, fasaxa waa lagala noqonayaa, kaliya waxaa loo baahan yahay in Dowladda la soo gaarsiiyo, waana shaqada kormeerayaasha, gaar ahaan , kuwa ka socda C.Badda iyo NSSta haddii ay jiraan.

Waxaa caadi ahayn in Markabku ku bixiyo bilaash:-

1. Raashihka kormeerayaasha &
2. Guunadooda.

**F.G:** waa la beddeli jiray kormeerayaasha 6 (lixdii) bil mar, si aysan ula saaxibin (qabsan) markabka.

**Qodob kale:**

Su'aasha weyn ee meesha taal waa: cidee ka warheysa waxa ay ka wadaan baddeena maraakiibta la siiyay fasax kulluumeysi, gaar ahaan kuawa Shiineyska:-

1. Kormeerayaal ma noo saraan yihiin oo naga ilaaliya maraakiibtaan, noona ilaaliya Kheyraadkeenna iyo Qarannimandeenna.
2. Waxaa dhici karta in maraakiibtaan la siiyey leesinada (fasaxa) ay ka wadaan badaheenna wax ka duwan wixii lagula heshiiyey oo fasaxa lagu siiyey – waxaa na soo gaartay warbixin sheegeysa in taargada lambarka HALKII Markab kasta ay ku shaqeystaan Dhowr Markab, waxa aan war laga heyna ka baddan.
3. Markii aad eegtid sawirrada laga soo duubay nooca maraakiibtaan ee baddeena ka kallumeysta waa naxeysaa, waayo wixii Badda ku jiray oo malay ah, waxaad isleedahay shabaqa ay soo galeen oo badda waxba kuma harin. (Dhab ahaan waa xaalufid)
4. HESHIISKAAN inta naga soo gasho (51 Markab) waxaa la leeyahay waa 1.5 (malyuu & Ber), Sanadkii Runtii inta HAL Markab uu qabto hal maalin (ama dheh hal nabar oo uu soo buuxsado Shabaqiisa beerta ah) ayaaba soo dhoweyneysa (Halka Milyan iyo Barka). Calaa kullin arrintu la socod ayay u baahan tahay.

# DHAQAALAHA BULUUGGA AH.

# (The Blue Economy)

Magacaani wuu cusub yahay, laakiin macnaha uu xanbaarsan yahay waa mid qadiimi ah oo Aadanuhu ay ku soo dhaqmaayeen muddo aad u fog oo taariikhyahannadu ay ku qiyaaseen 10,000 (Toban kun) sano ka hor dhalashadii Nabi Ciise (CS), waa markii Aadanuhu uu billaabay Beero-qodasho, Xoolo dhaqasho iyo Kalluumeysi. Reer Yurub (oo Ameerika ay kamid tahay dhaqan ahaa) dadkooda iyo culumadoodu waa Ummad ka hesha Baahinta iyo Abuurista waxa soo jiidashada (Yaabka) leh; Eeg Mowsuucadii Geniz ee lagu uruuriyo waxa layaabka leh, sida Neef Geel ah oo leh Laba lugood oo keliya, ruux dherir badan, mid miisaan badan, qof san aad u ballaaran leh, ama san aad u ROGGA; haddii kale fannaaniintooda ayaa Alifa wax la yaab leh oo ah muuqaal ama maqal.

Sidaas oo kale ayey muddo wadeen MEDEBBO kala duduwan ee dhaqaale, sida:-

1. Dhaqaalaha Cad (Teknolojiyadda iyo Isgaarsiinta).
2. Dhaqaalaha Madow (waa kan aan ahayn Qaanuuni sida dhaca, tuugada, wax isdabamarinta).
3. Dhaqaalaha Boorlaha ah (waa mid qarsoon oo canshuur aan la saari Karin).

4. Dhaqaalaha Cas (waa mid Dowladdu ay masuul ka tahay waxay ula jeedaan kan ku socda nidaamka Hanti wadaagga oo ay u yaqaanaan Casaan= Dhiig).
5. Dhaqaalaha Huruudka ah (waa kan baabi'iya Deegaanka, waa kan warshadaha badan oo qiiqa ($CO_2$) ku sii daaya hawada).
6. Dhaqaalaha Cagaaran (waa kan Beeraha oo muddo dheer Aadanuhu ay ku dhaqmaayeen, Reer Galbeedkuna ay aad u ammaani jireen, waayo Bii'ada ayuu bilaa, quud ayuu dhalaa, lacag adagna waa keenaa, shaqana waa bixiyaa, saboolnimadana hoos ayuu u dhigaa, laakiin waxay ku eedeeyaan inuu wasakh badan dhulka ku reebo………sidaas awgeed ayay keeneen fikradda dhaqaalaha Buluugga ah).
7. <u>Dhaqaalaha Bulugga ah (waxaa loola jeedaa dhaqaalaha kala duwan oo laga heli karo BADAHA).</u>

   Fikraddaan ka faa'iideysiga dhaqaalaha Badda muddo ku dhow 50 (Konton) sano (Nus qarni) ayay socotay, laga soo billaabo markii Q.M ay u magacowday guddi ka soo talabixiya sida la isku waafajin lahaa waxsoosaarka xowliga ku socda iyo badbaadinta Deegaanka. Guddigaan wuxuu qabtay Daraasad Qoto dheer iyo baaris cilmiyeysan oo lagu daabacay Buug lagu magacaabay BII'ADA IYO MUSTAQBALKA AADANAHA.

Fikradaha muhiimka ah ee Buugaan ku soo baxay waxaa ka mid ah:-

1. In waxsoosaarka iyo bii'ada la isku miisaamo oo kan hore uusan dumin kan danbe.
2. In la ilaaliyo sii jiritaanka kheyraadka Badda (Sustainability) si jiilalka soo socda ay ugu noolaan lahaayeen BARWAAQO.

Halkaan si adag ayay daraasaddu hoosta uga xarriiqday dhowrista sii jiritaanka kheyraadka badda (Sustainability) iyo ilaalinta bii'ada Badda.

Haseyeeshee fikradda dhaqaalaha Buluugga ah (Blue economy) waxay rasmi ahaan soo baxday waqtigii uu ka socday shirkii Bii'ada ee lagu qabtay magaalada REO DE JANEIRO Barazil 2012, waxaana soo jeediyey PROF. GUNTER POULI oo ahaa Reer BELGIUM. Markaas wixii ka danbeeyey magacaan dhaqaalaha Buluugga ah wuxuu aad u galay qoraallada Rasmiga, siyaasadaha URURADA Caalamiga ah iyo Dowladaha Dunida.

**<u>Nuxurka Macnaha dhaqaalaha Bulugga ah:</u>**

1. Maamulka wanaagsan ee kheyraadka Badda.
2. Badbaadinta Bii'ada Badaha si ay u noqoto irmaan aan gurin oo wada deeqa Jiilasha Nool iyo kuwa soo socda.
3. Waa qaab dhaqaale oo kharaj yar oo aan wasakheyneynin Bii'ada.

4. Abuuri kara fursado shaqo oo badan.
5. Aad hoos ugu dhigi kara gaajada iyo saboolnimada.
6. Dhaqaalaha Bulugga ah waxaa soo hoosgeli kara:-
    1. Kheyraadka Nool (kalluun iyo wixii ku isir ah).
    2. Kheyraadka aan nooleyn (Shidaal, macaadin IWM).
    3. Adeegga gaadiidka Badda iyo Dekedaha.
    4. Tamarta laga dhaliyo biyaha iyo dabeysha Xeebaha.
    5. Dalxiiska Badda (Xeebaha, Jasiiradaha & meelaha taariikhiga ah ee xeebaha IWM).

Runtii Soomaaliya way taqiin howshaan ah dhaqaalaha Badda wixii tabarteeda ahna way ka qabsan jirtay oo way ku nooleed.

Markii Soomaaliya ay qaadatay gobannimadeeda 1960kii waxay degsatay qorshihii hormarineed ee 1963-67. Waxaana ka mid ahaa horumarinta sektarka Badda (Dhaqaalaha Bulugga), sidoo kale dhammaan qorshooyinkii ka danbeeyey oo ahaa 6 (Lix) qorshe oo ku ekaa 1991 dii dhaqaalaha Buluuggu wuu socday, laakiin 1973dii ayaa dowladdii kacaanka ay abuurtay Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda si loo saaro culeys soo kicinta dhaqaalaha Buluugga ah, guulo la taaban karana oo caqligal ahna waa laga gaaray, haseyeeshee Qoondada uu ka heli jiray Sektarka Baddu Miisaaniyadda horumarinta aad ayey uga hoosesay tan loogu talagalay horumarinta Beeraha iyo Xoolaha, Bursigaasi weli wuu socdaa; waana gar sida la qabno aqoonyahanno badan oo waddani ah.

Soomaaliya inkasta oo ay tahay dowlad Badeed oo leh Xeeb dheer iyo Baaxad weyn ee Badeed oo uu si wanaagsan uga hirgeli karo dhaqaalaha Bulugga ah, haddana Soomaalida waa shacab qodoto ah iyo xoolo dhaqato, labadaan Sektar ayaa saldhig u ah quudkeenna iyo Baahitirkeenna kaleba.

Inta sektarka Baddu ku soo kordhiyo GDP-ga iyo Shaqa siinta waxaa lagu qiyaasaa 3-5% iyo 60,000-70,000 qof, halka GDP-ga intiisa kale ay ka timaaddo75-80% Sectorka Beeraha iyo Xoolaha, shaqasiintuna ay gaareyso ilaa 75% isla Sectaradaan danbe Warkaan ulama jeedo in dhaqaalaha Buluuggu uusan lahayn ahmiyad weyn.

Annagu haddii aan nahay Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed Shaqadaan, Muddo 8(Sideed) sano ah ayaan ku shuqlanayn horumarinta Sectarkaan Badda xag cilmibaaris, tababar iyo wacyigelinta ka faa'iideysiga kheyraadka Badda. Waxaana ku fadhiisinney qorshaha horumarineed ee Dalka iyo Goolasha Q.M (UNSDG) ee 2015-30ka, si gaar ahna waxaan ugu bayaaninay annagoo carrabka ku adkeyneyna magaca dhaqaalaha Bulugga ee Qorshaha Hey'addan 2022-26.

Ha guuleysto Qorshaha hirgelinta dhaqaalaha Bulugga ah laakiin Rumi waa sheegid waxaa hortabinta ka leh horumarinta Sectorada Beeraha iyo Xoolaha oo aan wax ka soo xusnay AHMIYADDA ay leeyihiin.

# AKADEEMIYADDA CULUUMTA BADDA

Akadeemiyadda Culuumta badda waxaa la aasaasay 2015kii, si ay u daboosho qeyb ka mid ah baahinta aqoonta Badda. Akademiyaddu waxay waqtigaan ka kooban tahay 3 (saddex) Kulliyadood oo ah heer Jaamacadeed oo u shaqeysa si kaltan ah oo ugu badnaan laba kulliyadood ay wada kulmi karaan.

Kulliyaadkaani waxay soo wada saartay Dufcooyin kala ah:-

1. Kulliyadda Culuumta Badda (Kalluun & Bii'ad) 15 BS.
2. Kulliyadda Qaanuunka Badda (kan Dalka & kan Caalamiga) 15 BA.
3. Kulliyadda Badmaridda iyo Makaanikada 15 BS.
4. Hadda waxaa socda Dufcadii 2aad ee Kulliyadda Culuumta Badda.

Akadeemiyadu waxa ay kaloo leedahay Dugsi Tababar oo Sanad kasta Bixiya Tababarro gaagaaban (3-6 Bil) iyo kuwa dhaadheer oo socda 1-1.5 (sanad ila sanad iyo bar). Korosyadaan waxay ku saabsan yihiin culuum kala duwan oo xoog si gaar ah loogu saaro BARAATIKADA (tababarrada gacanta laga barto) sida Shabaag tolidda, Doon wadidda, Barashada Matoorrada Doomaha iyo Batariyaashooda, Qalidda Kalluunka iyo Qaboojintiisa.. IWM. Sidoo kale Dugsigu wuxuu bixiyaa korosyo Maamul, sida Barashada Computerka, Maamulka Xisaabaadka, iyo Shaqaalaha, sidoo kale wuxuu Dugsigu uu bixiya korosyo gaagaaban oo la

xiriira: sare u qaadidda aqoonta Badda, gaar ahaan Cilmibaarayaasha aan laheyn Takhasus Badeed.

Waqtiga hadda la joogo Dugsiga waxaa ku jira 25 (shan iyo labaatan) oo isugu jira Shaqaale Hore iyo kuwo shaqo sugayaal ah; oo ku tababaranaya aqoonta Computerka, Maamulka, Qaanuunka Badda iyo Aqoonta Guud ee Badda. Koroska waxaa loo qorsheeyey 4 (afar) bilood. Koroskaan waxaa furay Wasiir-ku xigeenka Wasaaradda Dekedaha & G/Badda: Xil Saddaam Maxamuud Cabdi 14/9/2022 Wasiir ku xigeenku wuxuu ku amaanay Akadeemiyadda iyo Hey'adda iyo Macallimiinta, wuxuuna ku boorriyey ardayda inay si fiican ugu faa'ideystaan koroskaan si ay dowr weyn uga qaadan lahaayeen Cilmibaarista Hey'adda, Macallimiinta Akadeemiyadda iyo Howlaha Ballaaran ee Wax-soosaarka Badda iyo adeegyadeeda kale.

Dabadeed Wasiir ku xigeenku wuxuu kormeer ku sameeyey Akadeemiyada asagoo ka billaabay kulliyadda Culuumta Badda lana hadlay ardayda ku jirta kuna adkeeyey inay aad ugu dadaalaan barashada cilmiga Badda, dabadeed wuxuu booqday Wasiirku Barxadda Shabaagta, Macallimkeeduna war-bixin ayuu ka bixiyey sida loo diyaariyo, loo dayactiro, Badda loo dhigo… Dabadeed Wasiirku wuxuu soo wada maray xafiisyada Akadeemiyadda iyo Maktabadda.

Wasiirka waxaa ku wehliyey kormeerkiisa Guddoomiyaha Hey'adda cilmibaarista badaha Soomaaliyeed ADM GAAS Prof

Faarax Axmad Cumar, waxaana soo dhaweeyey Madaxda waxaana warbixin siiyey Rectarka Akadeemiyadda ahna Guddoomiyaha ku-xig Guddoomiyaha Hey'adda cilmibaarista badaha Soomaaliyeed MD Cabdinuur Cabdulqaadir Max'ed, Howlwadeennada iyo Macallimiinta Akadeemiyadda.



**Wasiir ku xigeenka & Guddoomiyaha oo u diyaargaroobaya furitaanka koroska.**



**Ardaydii oo shabaagta diyaarinaya; macalinkuna hagaayo.**



**Tolidda Shabaagta**



**Xafladda qalinbedelasho ee 2021da, Guddoomiyaha, Rectorka iyo Maclimiintaba xaadir ay yihiin**



**Deegaanka oo dhageysanaya DARSI Wacyigelin ah.**

# Qeybta 3aad

# Dhacdooyinka

# Doorashooyinka Golayaasha Baarlamaanka & Madaxweynaha

**Hordhac:**

Tan iyo intii ay burburtay dowladdii dhexe ee Soomaaliya sanadkii 1990, waxaa dalka soo maray marxalado iyo doorashooyin kala duwan. Shacabku marna fursad umaysan helin in codkooda ay dhiibtaan, waxaana madaxda lagu soo dooranayay qaabab kala duwan oo aan codayn toosa ahayn.

Balse doorashaba doorashada ay ka danbeysay waxaa la sameynayay isbadal islamarkaana waxaa lagu darayay qaabab cusub.

Doorashadii Carta Jabuuti oo lagu soo doortay Cabdiqaasim Salaad Xasan 25kii August 2000.

Doorashadii Eldoret Kenya oo lagu soo doortay Cabdullahi Yuusuf Axmed 10kii Oktoobar 2004-tii.

Doorashadii Jabuuti oo lagu soo doortay Sheekh Shariif Sheekh Axmed January, 2009-kii.

Doorashadii Muqdisho oo lagu soo doortay Xasan Sheekh Maxamuud August 2012-kii.

Doorashadii Muqdisho oo lagu soo doortay Maxamed Cabdullaahi Farmaajo 8 February 2017-kii.

Sidaas darteed ayaa lagu wadaa inay dalka doorashada Baarlamaanka 11aad iyo Madaxweynaha 10aad, sanadka 2020/21.

**Sharciga Doorashooyinka**

Taariikhdu markay ahayd 28 Disembar 2019, Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ansixiyay Sharciga Doorashooyinka Heer Federaal; iyaga oo ka dibna u sii gudbiyay Golaha Aqalka Sare sida uu qabo nidaamka xeer dejinta Soomaaliya. Dood ka dib xubnaha Aqalka Sare waxay iyaguna ansixiyeen sharciga 08 Febraayo 2020.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa sharciga saxiixay 21 Febraayo 2020.

**Ujeedooyinka Sharciga waa:**

1- In lagu maamulo Sharcigaan doorashada labada aqal ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya.

2- Inuu tilmaamo habraaca Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya.

3- In lagu hirgaliyo doorashooyin waqtiyaysan oo qof iyo cod ah, xor iyo xalaalna ah, toos ah, dadkuna codkooda si qarsoodi ah u dhiibtaan.

**Mabaadii'da asaasiga ah ee Sharciga**

1- Inay noqdaan doorashooyinku kuwo waqtiyaysan, qof iyo cod ah, una dhaca si xor ah, toos ah si waafaqsan sharcigan iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya, heshiisyada caalamiga ee Soomaaliya qaybta ka tahay.

2- cod-bixiyeyaashu waxay si siman xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada codkooda.

3- Muwaadin kasta oo ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto lana doorto iyadoo qofna lagu takoorin, qolo, midab, isir, dhaqan ama lahjad, jinsi, dadka qaba baahiyaha gaarka ah, fikir siyaasad, xirfad, heerka bulsho ama dhaqaale iyo wax kasta oo la halmaala.

4- In la dhowro qarsoonida iyo xorriyadda sir ahaanta dhiibashada codka.

**Soojeedintii Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka**

27 Juunyo 2020 Gudoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka, Xaliimo Ismaaciil Ibraahim (Xaliimo Yarey) ayaa Golaha Shacabka ka horjeedisay, Soojeedin taasoo ku saabsaneyd doorashada lagu wado inay ka dhacdo Soomaaliya.

Xaliimo Yarey ayaa soo bandhigtay laba nooc oo ay u dhici karto doorashada soo socoto, iyadoo sheegtay in nooca ku xusan sharciga doorashooyinka ee 21 Febraayo 2020 uu saxiixay

Madaxweyne Farmaajo uu yahay mid waqti iyo kharash badan u baahan.

**Nooca koobaad**

Gudoomiyaha ayaa tilmaantay in sida ku xusan sharciga doorashooyinka, nooca diiwaangelinta codbixiyaha ay noqoto habka casriga ah ee Biometric-ga, kaasoo u baahan hawlo ay kamid yihiin:

1- In la soo iibiyo qalabka diiwangalinta codbixiyaha.

2- In hay'adaha amniga xaqiijiyaan xarumaha lagu diiwangalin karo codbixiyaha ee la sugi karo amnigooda.

3- In la fuliyo wacyigelin balaaran si dadwaynuhu uga qaybgalaan is diiwaangalinta.

4- In la geeyo qalabka iyo shaqaalaha diiwangalinta xarumaha diiwaangalinta.

5- In la diiwaangeliyo codbixiyaasha xaqa u leh codaynta.

6- Soo saaridda liiska codbixiyaha ee rasmiga ah.

7- Qaybinta kaarka aqoonsiga codbixiyaha.

8- Diiwaangalinta Rasmiga ah ee Xisbiyada Siyaasadda.

9- Diiwaangalinta Musharraxiinta xildhibaannada.

10- Ololaha Doorashada Xisbiyada.

11- Qabashada Doorashada (maalinta codbixinta)

Gudoomiyaha Guddiga Xaliimo Yarey ayaa sheegtay in si ay u qabtaan doorasho habkaasi ku dhacda in loo baahan yahay muddo 13 bilood oo ka billaabanaysa July 2020 kuna eg August 2021.

Waxa ay intaa ku dartay in habkaasi aan lagu hirgelin karin waqtiga kooban ee ka harsan doorashada baarlamaanka oo la filayay inay dhacayso 27 November 2020.

**Nooca Labaad**

Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka ayaa soo bandhigay hab labaad oo ka duwan kan hore, uuna sheegay inuu ka waqti iyo kharashba yar yahay.

Waa habka diiwaangelinta gacanta ee isla maalinta codbixinta, kaasoo dadka codkooda dhiibanaya lagu diiwaangelinayo gacanta isla maalinta codbixinta iyada oo la adeegsanayo diiwaan gelin qoraal ah.

Gudoomiyaha Guddiga Xaliimo Yarey ayaa sheegtay in si ay u qabtaan doorasho habkaasi ku dhacda uu guddigeedu u baahan yahay muddo 9 bilood ah oo ka billaabanaysa July 2020 kuna eg March 2021.

Soojeedintii Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka ayaa waxaa ka soo horjeestay midowga musharaxiinta, mucaaradka, maamul goboleedyada Puntland iyo Jubaland, iyagoo ku

tilmaamay in soojeedinta Guddiga ay tahay muddo kororsi sharci darro ah.

**Shirarkii Doorashooyinka dalka**

2020, 17 September Waxaa dhacay Shir Madaxeed ay isugu yimaadeen Madaxda Dowladda Federaalka iyo kuwa maamul Goboleedyada, wuxuuna ka dhacay magaalada Dhuusamareeb, Waxaa lagu heshiiyay hannaan doorasho dadban oo goleyaal ay soo dooranayaan xubnaha baarlamaanka iyo Aqalka sare, kuwaas oo sii dooranaya madaxweynaha. Waxaa hannaankaas ansixiyay Baarlamaanka Soomaaliya.

Qodabadii ka soo baxay Heshiiskii 17 September 2020 ee ka dhacday Dhuusa mareeb:

1. In Dowladda Federaalka ay magacawdo Guddi Doorasho oo heer Federaal ah kaas oo kaashanaya Guddi Doorasho oo heer Dowlad Goboleed ah.

2. In deegaan doorashooyinka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka laga asteeyo, labo magaalo oo kala ah caasimadaha Gobollada oo ku dhisan yahay Dowlad Goboleed kasta, iyo mid kale.

3. In tirada ergada Xildhibaan walba u codeynaysa ay noqoto 101 ergo oo mataleysa beesha wadaagta kursigaas.

4. In xulista ergada ay iska kaashanayaan odayaasha dhaqanka, bulshada rayidka ah iyo Dowlad Goboleedka.

5. In qoondada haweenka ee 30% ah la ilaaliyo.

6. In Baarlamaanka heer Dowlad Goboleed ay soo doortaan Xildhibaannada Aqalka Sare.

7. In Xildhibaannada Aqalka Sare ee Soomaaliland ay soo doorataan ergo matasha oo wada jir ah.

8. In doorashada Xildhibaannada labada Aqal ee Soomaaliland ay ka dhacdo magaalada Muqdisho.

9. Qorshaha doorashooyinka dalka waxa uu bilaabanayaa 1-da Nofeembar 2020.

10. In sugidda amniga doorashooyinka ay ka wada shaqeeyaan hay'adaha amniga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah.

11. Heshiiskaan siyaasadeed waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka si ay u meel mariyaan.

**Dhiciddii Xukuumaddii R/w Xasan Cali Khayre**

25 Luulyo 2020 Golaha Shacabka Soomaaliya ayaa sheegay in uu kalsoonidii kala noqday xukumaadda Ra'iisul wasaare Xasan Cali Khayre.

Baarlamaanka ayaa ku eedeeyay xukumadda Kheyre inay ku guul dareysatay arrimo dhowr ah oo muhiim u ahaa qabsoomidda doorasho qof iyo cod ah. Qodobada uu Guddoomiye Mursal sheegay inay xukumadda Khayre ka gaabisay waxaa ka mid ah:

1- Diyaarinta hanaan iyo qorshe cad oo lagu gaaraya doorasho qof iyo cod ah 2020/2021.

2- Dhameystirka federaaleynta heerarka kala duwan.

3- Go'aan ka qaadashada maqaamka caasimadda ka hor wakhtiga doorashada.

4- Afti u qaadista iyo meel marinta Dastuurka.

5- Hirgelinta nidaamka Axsaabta siyaasadeed.

6- Diyaarinta ciidamo amniga sugan heer federaal iyo dowlad goboleed ah oo sugo amniga doorashada.

7- Diyaarinta qoondadii dhaqaale ee lagu qaban lahaa doorashada oo aan lagu soo darin miisaaniyadda 2020.

17-kii Sebteembar 2020, Madaxweyne Farmaajo ayaa u magacaabay Maxamed Xuseen Rooble in uu noqdo raysal wasaaraha cusub ee bedelaya Xasan Cali Khayre.

**Geeddi socodkii Doorashooyinka**

2021, 12 April - Golaha Shacabka wuxuu kordhiyay muddo xileedkii madaxweyne Farmaajo oo laba sano ay ku dareen.

Wuxuu sidoo kale golahu ansixiyay xeer xukuumadda ku amrayay in dalka loo diyaariyo doorasho qof iyo cod ah oo ku dhacda labadaas sano gudahooda ah. Waxaa arrintaas ka soo horjeestay musharraxiinta mucaaradka. Sababta oo ah (Muddada xilka baarlamaanka waxay dhammaatay 27-kii December 2020, sidoo kale xilka madaxweynaha wuxuu dhammaaday 8 February 2021)

2021, 25 April - Waxaa Qeybo ka mid ah Muqdisho lagu arkay ciidamo milatari ah oo ka gadooday muddo kordhinta dowladda. Waxay fariisimo ka sameysteen qeybo ka tirsan caasimadda, ka dibna waxaa magaalada ka dhacay isku dhac u dhexeeyay ciidamadaas iyo kuwa dowladda.

2021, 1 May - Madaxweyne Farmaajo oo la hadlay Golaha Shacabka ayaa sheegay in ay ka noqdaan xeerkii muddo kordhinta, wuxuuna amniga iyo hannaanka doorashada ku wareejiyay Ra'iisul Wasaare Rooble.

2021, 1 May - Ka dib Golaha Shacabka waxay u codeeyeen in la tuuro muddo kordhintii labada sano ahayd, laguna noqdo heshiiskii 17 September 2020.

2021, 3 May - Ra'iisul Wasaare Rooble wuxuu ku baaqay in madaxda dowlad-Goboleedyada ay ka soo qeybgalaan shir Muqdisho ka dhaca 20 may 2021, si looga wadahadlo khilaafka doorashada dib uga dhacday wakhtigeeda.

2021, 22 May - Waxaa magaalada Muqdisho si rasmi ah uga furmay Shirka wadatashiga arrimaha doorashada ee Ra'iisul Wasaare Rooble uu ku baaqay, waxaana ka qeybgalay madaxda maamul Goboleedyada iyo gudoomiyaha Gobolka Banaadir.

Gabagabadii shirkan waxaa laga soo saaray bayaan ka koobnaa 18 qodob oo la xiriiray amniga, dardargelinta doorashooyinka, daahfurnaan iyo jaangoynta xilliga lasoo gabagabaynayo doorashada.

Waxaa madaxdu isku raaceen in doorashada Golaha Shacabka lagu soo gaban gabeeyo, mudada u dhexeysa 15-ka Janaayo ilaa 25-ka Febraayo.

Bayaanka Golaha Wadatashiga Qaran ayaa lagu yiri qodobkiisa koobaad "Kahor inta aan la qaban doorashada kursi kasta ee Golaha Shacabka, waa in la caddeeyo, la diiwaangeliyo, lana shaaciyo magacyada xubnaha guddiga soo xulista ergada ee ka kooban duubabka, iyo caaqillada rasmiga ah iyo bulshada rasmiga ah ee beelaha ama jufooyinka kursiga wadaaga"

Golaha Wadatashiga Qaran ayaa sidoo kale isku raacay in aan doorashada laga hor istaagi karin musharraxiinta buuxisa shuruudaha doorashada.

Bayaanka ayaa sidoo kale lagu sheegay in guddiga doorashada uu u madaxbannaan yahay hirgalinta doorashada, si waafaqsan

heshiisyadii 17-kii September 2020, 1-dii Oktober 2020, 27-kii May 2021, 22 August 2021.

1 November 2021, ayaa la doortay xildhibaankii ugu horreeyey ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11-aad ee dalka.

28-kii April 2022, Aadan Maxamed Nuur (Aadan Madoobe) ayaa loo doortay guddoomiyaha golaha shacabka ee Soomaaliya, sidoo kale waxaa la doortay labada gudoomiye ku xigeen, Gudoomiye ku xigeenka koowaad waxaa u soo baxay Sacdiya Yaasiin Xaaji (Samatar), Halka guddoomiye ku-xigeenka labaad loo doortay C/llaahi Cumar Abshirow.

26-kii April 2022, Cabdi Xaashi Cabdullaahi, ayaa mar kale loo doortay Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, sidoo kale Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa ku guuleystay kursiga guddoomiye ku xigeenka koowaad ee Aqalka Sare, halka Senator Cabdulaahi Cali Timacade uu isna ku guuleystay kursiga guddoomiye ku xigeenka labaad.

Doorashada Soomaaliya oo dib u dhacday muddo ka badan sanad sababo la xiriira khilaafaad siyaasadeed, ayaa ugu dambeyntii 15-kii May 2022, la soo gabagabeeyay doorashada madaxweynaha Soomaaliya, waxaana ku guuleystay Xasan Sheekh Maxamuud.

15-kii May, 2022 doorasho si weyn loogu loolamay ayay Xildhibaanada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ugu doorteen Xasan Sheekh Maxamuud inuu noqdo

Madaxweynaha 10-aad ee Soomaaliya. Wareegii 3-aad ee doorashada ayuu helay saddex meelood labo meel codadkii la dhiibtay, waxaana uu ka guuleystay Maxamed Cabdullaahi Farmaajo oo horey Xasan Sheekh ugala wareegay xilka doorashadii 2017. Waa markii ugu horeysay taariikhda Soomaaliya ee madaxweyne hore dib loo doorto.

15 Juunyo 2022 Madaxweynaha Soomaaliya Xasan Sheekh ayaa Ra'iisal wasaare u magacaabay Xamsa Cabdi Barre oo ah xildhibaan ka tirsan Golaha Shacabka.

15 Juunyo 2022 Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu Baarlamaanka horgeeyay Ra’iisul wasaare Xamse Cabdi Barre.

2-dii August 2022 Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Xamse Cabdi Barre ayaa magacaabay xubnaha golaha wasiirrada ee xukuumadda federaalka oo ka kooban, Ra’iisul Wasaare ku xigeenka, 25 Wasiir, 25 Wasiir ku xigeen iyo 24 Wasiiru dowle.

7-dii August 2022 waxay Baarlamaanku ansaxiyeen golahii Xukuumadda Ra’iisul wasaare Xamse Cabdi Barre, waxaana ogolaatay 229 Xildhibaan.

Waxaa soo gabagaboobay dib-u-dhac iyo khilaaf joogto ah oo ka jiray hannaanka doorashada baarlamaanka iyo fulinta dalka oo soo jiitamayay muddo sanad ka badan.

# ABAARAHA DALKA

## *Hordhac*

Nolosha aadanaha, tan duunyadooda iyo beerahooduba waxa ay ku xiran tahay in la helo biyo dadka iyo xooluhu cabaan, beerahana lagu waraabsado. Haddii biyo la'aan dhacdo waxaa hoos u dhac ku yimaadaa waxsoosaarka beeraha iyo dhirta, taasina waxa ay sababtaa in ay adkaato kobaca iyo sii socoshada nolosha aadanuhu.

Abaaraha daran ee ka jira gobolka Geeska Afrika ayaa ah kuwii ugu darnaa ee soo mara muddo dheer, waana markii ugu horraysay ee muddo afartan sano ah la diiwaangeliyo in afar xilli roobaad oo isku xiga aan roobabku u di'in sidii la filayey.

## **Xaaladda abaarta ka jirta Soomaaliya.**

Guud ahaan dalka Soomaaliya waxaa ka jirta abaartii ugu darnayd muddo 40 sanno ah, waxayna soo jiitamaysay mudo labo sanno ah oo ay dadka iyo duunyaduba la soo tacaalayeen, 6.9 milyan oo qof ayay saamaysay oo udhiganta 42% guud ahaan dadka ku dhaqan dalka, waxay ka barakicisay deeganadoodii 894 kun oo qof si ay uhelaan biyo iyo baad, halka 1.5 milyan caruur ahi la ildaran yihiin nafaqo darro ba'an.

In kastoo guud ahaan dalka ay si siman u saamaysay haddana xogta ay Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS) hayso waxaa ka mid ah dhulka ay ku dhaqanyihiin xoolo-dhaqato beeralayda gobolada Bay iyo Bakool, reer miyiga gobolka Gedo, deegaannada Cadduunka iyo Hawdka ku yaal gobollada Hiiraan, Galguduud, Mudug, Nugaal, Sool iyoTogdheer, tan iyo sannadkii 2021, DFS waxay samaysay dadaalo iyo talaabooyin wax lagaga qabanayo xaaladda Abaaraha, waxaana ka mid ahaa:

Nofembar 2021, In Golaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya (XFS) ku dhawaaqeen in Abaartu tahay xaalad degdeg, waxaana loo diray baaq dhammaan saaxiibada Soomaaliya, beesha caalamka iyo deeqbixiyayaasha.

Disembar 2021, Golaha XFS waxa ay ku dhawaaqday in bil walba 20% laga jari doono mushaharaadkooda loona isticmaali doono arrimaha gurmadka Abaaraha, bishii, Janaayo iyo Abriil 2022, DFS waxay qabatay shirar lala yeelanayo Deeqbixiyaasha, Ururrada Bulshada Rayidka, Ganacsatada iyo Culimada Soomaaliyeed si loo dardargeliyo gurmadka Abaaraha inta aysan xaaladdu sii xumaan.

Maajo-Luulyo 2022 Madaxweynaha DFS waxa uu u magacaabay Ergayga Gaarka ee gurmadka Abaaraha, halka ay DFS ka heshay dawladda UAE $9.6 milyan oo loogu talogalay gurmadka Abaaraha, iyadoo tan iyo bilowgii gurmadka Abaaraha 3,200 tan oo raashin ah la gaarsiiyay dad ku dhow nus malyuun qof.

Agoosto-Sibtember 2022 Waxay ay DFS dib u hawlgelisay Hay’adda Maareynta Masiibooyinka, iyadoo la asaasaasay Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha oo ka kooban 16 xubnood oo isugu jiray Wasiiro, Culimo, Ganacsato iyo Bulshada rayidka, xoghayna u tahay Xarunta Qaran ee Hawgallada Gurmadka Degdegga ah (NEOC).

Xilli-roobaadkii afraad oo is xiga ayaan si waafi ah uga di'in Soomaaliya. Gaajo, cudurro iyo barakac ba'an oo ka dhashay ayaana sababay in dalku galo xaalad adag oo macluul qarka u saaran.

In ka badan 800,000 oo qof ayaa tan iyo billowgii sanadkii 2021 dantu ku kalliftay inay ka barakacaan guryahoodii, abaarta ka jirta Soomaaliya awgeed, sida ay sheegayaan hay'adaha gargaarka,

iyadoo tirada dadkana laga cabsi qabo inay kororto oo ay gaarto ilaa 8 Milyan (siddeed milyan). Taas oo ka dhigan abaartii ugu darnayd ee soo marta Soomaaliya 40-kii sano ee ugu dambeeyay.

**Abaarta Soomaaliya oo mareysa xaalad deyro ah**

Abaaraha baahey iyo baad la'aanta waxaa dheer biyo yaraanta dalka ka jirta, iyada oo meelaha qaar cabsi laga qabo in ay qallalaan ceelashii jiraaga ahaa ee jiilaalka lagu xisaabtami jirey.

Sida hay'adaha gargaarku sheegayaan, abaartan waxay saamaysay ku dhowaad kala bar dadka Soomaaliya ku nool. Iyada oo laga cabsi qabo in ay siyaaddo macluusha iyo nafaqa daradda carruurta haysa.

Halista ugu weyn ayaa waxay timid kaddib markii la waayey roobabkii di'i jirey afar xilli oo isku xiga.

September 26, 2022 Ra’iisul Wasaare Ku Xigeenka Xukuumadda Feredaalka Soomaaliya Mudane Salax Axmed Jaamac, oo guddoomiyay shir heerkiisu sareeyo oo looga hadlayay gurmadka abaaraha, ayaa caddeeyay inaan waqti dambe harin oo lagama maarmaan ay tahay in la dardargeliyo gurmadka abaaraha si loo badbaadiyo dadka Soomaaliyeed ee ay abaartu saameysay.

Ra’iisul Wasaare ku-xigeenka, ayaa sheegay in dowladda Soomaaliya ay horay u qaadday tillaabooyin muhiim u ah gurmadka abaaraha, ayna qaadatay door hoggaamineed oo wax ku ool ah, waxuuna xusay in cid waliba oo xilligan adag garab istaagta shacabka iyo dowladda Soomaaliyeed ay u heyn doonaan abaal weyn oo aan duugoobayn.

Soomaaliya ayaa wajaheysa xaalad degdeg ah oo abaareed, iyadoo qiyaastii 4.5 milyan oo qof ay saameeyeen dhibaatadu, halka ay 3.2 ka ahaayeen bishii December 2021. Guud ahaan,


malaayiin Soomaali ah ayaa ku barakacay gudaha dalka, sida ay sheegtay OCHA, iyadoo xilli roobaadka soo socda laga cabsi qabo roob yaraan.

Qaramada Midoobay ayaa sheegtay in dadka Soomaalida ah ee ay abaaruhu saameeyeen ay sare u sii kacayaan marba marka ka dambaysa, iyada oo bishii March sanadkaan 2022 lagu qiyaasayey dadka abaaruhu saameeyeen inay gaadhayeen illaa 4.9 million oo qof waxaase haatan la sheegayaa in tiradaasi ay marayso illaa 6.1 million oo Soomaali ah oo ay ku jiraan illaa 760,000 qof oo barakacayaal ah.

Qaramada Midoobay ayaa sheegaysa in hay'adaha gargaarku ay illaa 2.6 million oo qof ay gaadhsiiyeen kaalmooyin lagu badbaadinayo nolosha dadka tabaalaysan, kaalmadaas oo ay ku jiraan lacago caddaan ah.

Qaramada Midoobay ayaa codsatay inay u baahan yihiin illaa $1.5 billion oo dollar si wax looga qabto xaaladda abaarta daran ee jirta, hase ahaatee waxay sheegeen inay heleen oo keliya illaa $66.7 million oo dollar oo u dhiganta 4.5% lacagta ay codsadeen.

# WARBIXIN LAGA SOO SAARAY HEERKA XAALADDA ABAARAHA SOOMAALIYA:




Maammulka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xaruntiisa Hawlgallada Gurmadka Degdegg ah, ayaa soo bandhigay xog ururin ku saabsan baaris qoto dheer oo 10-kii bilood ee u danbeeyay lagu sameeyay saamaynta abaaruhu ay ku yeesheen dadka iyo duunyadaba.

Xafiiska oo kaashanaya dhammaan Wasaaraddaha heer Federal iyo Dawlad goboleedyada dalka ayaa xog uruurin iyo baaris qoto dheer ku samaysay saamaynta abaaraha ee 10-kii bilood ee la soo dhaafay.

Soomaaliya waxay maraysaa abaartii 3-aad mudo 10 sanno gudahood. Abaartani waxay darajo ahaan ku dhawdahay Macaluul waana abaartii ugu cusleyd tan iyo sanadkii 1981.

Sida xogta Xaruntu muujineyso dalku guud ahaan wuxuu ku sii siqayaa darajada 5-aad oo ah tan ugu darran xagga saameynta.

Soomaaliya waxay qarka u saaran tahay gaajo baahsan oo ba'an iyo macaluul wadareed galaafan karta nolosha boqolaal kun oo qof, Tan iyo billowgii sanadkan, xaaladda degdegga ah ee abaaraha ka jira Soomaaliya ayaa aad uga sii daray.

Afar xilli roobaad oo xiriir ah ayaa baaqday, taasoo abuuraysa abaartii ugu darneyd ee Soomaaliya ka dhacda ugu yaraan afartan sano. Isla markaana, waxaa sare u kacay qiimihii cuntada, gargaar bini'aadannimana ma gaarin malaayiin Soomaali ah, maadaama kheyraadkii lagu dabooli lahaa baahiyahooda uu yahay mid xadidan.

Hadda waxa jirta khatar la taaban karo oo ah in xilli-roobaadka soo socda uu sidoo kale ka hoos mari karo celceliska, taas oo ka dhigi karta xilli-roobaadkii shanaad oo xiriir ah oo baaqda, taasi oo aan hore loo arag, haddii saadaashani ay dhabowdo, xaaladdu way ka sii dari doontaa.

Dhibaatooyinka nafaqo-darrada ayaa loo badinayaa inay sii xumaadaan iyadoo xaaladda nafaqadu ay aad uga sii darayso deegaamada ay dhibaatadu saameysay iyadoo gaaridda dadka u baahan gargaarka ay weli ku adag tahay hay'adaha samafalka.

Ku dhawaad 3 milyan oo xoolo ah ayaa ku dhintay abaarta tan iyo bartamihii 2021-kii, hoos u dhaca ku yimid wax soo saarka hilibka iyo caanaha ayaa sidoo kale horseeday nafaqo darro ka sii daraysa, gaar ahaan carruurta yaryar ee ku nool deegaamada xoolo dhaqatada ah oo ku tiirsan Caanaha iyo Hilibka xoolaha. Laga soo bilaabo Maajo 2022, qiyaastii 1.5 milyan oo carruur ah oo da'doodu ka yar tahay 5 sano ayaa wajahaya nafaqo-darro ba'an dhammaadka sannadka.

Soomaaliya oo safka hore kaga jirta isbeddelka cimilada waa dalka ugu daran ee ay abaaruhu saameeyeen Geeska Afrika.

Qiyaastii 3.2 milyan oo qof oo ku nool 66 ka mid ah 74-ta degmo ee dalka ayaa wajahaya saameynta saddex xilli-roobaad oo is xigay kana hooseeyay celceliska roobabka la heli jiray, oo ay ku jiraan 169,000 qof oo guryahooda uga tagay si ay u raadsadaan biyo, cunto iyo daaq.

**12 Apr 2022 WAR-SAXAAFADEED AY KU MIDEYSANYIHIIN FAO-OCHA-UNICEF-WFP EE XAALADDA ABAARTA SOOMAALIYA.**

Soomaaliya waxa ay wajaheysaa xaalad macaluul ah iyadoo duufaan aad u daran oo astaan u ah roob yari, qiimaha cuntada oo cirka isku shareeray iyo dhaqaale yari aad u badan ayaa keenay in ku dhawaad 40% Soomaalida ay qarka u saran yahiin macluul.

Malaayiin Soomaali ah ayaa halis ugu jira inay ku habsato macluul, iyadoo saameynta abaarta daba dheeraatay ay sii waddo inay baabi'iso nolosha iyo noolaha, iyadoo baahida sii kordheysa ay ka badan tahay gargaarka bani'aadamnimo ee loo heli karo, ayay ka digeen hay'adaha Qaramada Midoobay.

Hay’adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Cunnada iyo Beeraha (FAO), Xafiiska Isku dubbaridka Arrimaha Bani’aadamnimada (OCHA), Sanduuqa Carruurta ee Qaramada Midoobay (UNICEF), iyo Hay’adda Cunnada Adduunka ee (WFP) ayaa ku baaqaya in si degdeg ah dhaqaale loogu deeqo, si loo suurtageliyo in sare loo qaado gargaarka naf badbaadinta ee Soomaaliya.

Carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano ayaa ka mid ah kuwa ugu nugul abaarta sii xumaanaysa, waxaana aad u yar helidda cunnada iyo caanaha taasoo ay ugu wacan tahay sare u kaca qiimaha badeecadaha iyo hoos u dhaca qiimaha xoolaha. Ku dhawaad 1.4 milyan oo caruur ah ayaa soo wajahday nafaqo darro aad u daran sanadkan 2022 dhamaadkiisa.

## Sida ugu wanaagsan ee Abaarta loola tacaali karo

Abaarta sida ugu wanaagsan ee loola tacaali karo waa in marka hore loo diyaar garoobo, markii ay dhacdana si deg-deg ah looga jawaabo.

Sidoo kale, waa in abaarta kadib la diiwaangeliyo khasaaraha ay abaartu u geysatay dadka, xoolaha, dalaga, bay'ada, dhaqaalaha dalka iyo casharradii laga bartay abaarta si waayo-aragnimadaas loogu isticmaalo la tacaalidda iyo yareynta saameynta abaaraha mustabalka dhici doona.

Dadka Soomaaliyeed ee u baahan gargaar bini'aadamnimo waxaa lagu qiyaasayaa 7.7 milyan. Waxaa kale oo la saadaalinaya in 1.5 milyan oo carruur ah ay soo wajihi doonto nafaqo-darro ba'an, halka 4.8 milyan oo ka mid ah dadka Soomaaliyeed ay soo food saari doonto cunto yari/la'aan. Sidoo kale, 4.9 milyan ayay caga cageynayaan dadka ay saameeyeen abaaruhu, halka in ka badan toddoba boqol kun oo qofood ay abaartu ka barakaceen guryahoodii (QM, Maarso 2022).

Abaartu waa ay ka duwan tahay musiibooyinka kale ee dabiiciga ah sida duufaannada iyo daadadka.

In ka badan 15% boqolkiiba waxyeellada iyo khasaaraha masiibooyinka dabiiciga ah waxaa sababa abaarta. Sidoo kale, abaartu waa halista ugu weyn ee dabiiciga ah taas oo saameysa xoolaha. Tusaale, abaartu waxa ay sabab u tahay 85.8% xoolaha dhinta Cuntada iyo Dalaga.

Abaaraha waxaa loo qaybiyaa dhowr siyaabood, waxaana ka mid ah:

1. Abaarta Saadaasha Hawada (meteorological drought): Abaartani waxa ay dhacdaa marka uusan da'in roob ama roobka

da'ay uu ka hooseeyo qaddarta caadiga ah ee xilli roobaadkaas la sugaayay.

2. Abaar biyood (hydrological drought): Abaarta biyo la'aantu waxa ay dhacdaa marka ay roob la'aantu sii socoto waqti dheer, taas oo ugu dambeyn sababta in ay qallalaan webiyadu ama uu hoos u dhac weyn ku yimaado qaddarta biyaha ceelasha ku jira ama oogada dul saran haraha iwm.

3. Abaarta Dalaga/Beeraha (Agricultural drought): Abaartani waxa ay bilaabataa marka biyo la'aantu sababto in uu yaraado qoyaanka ciid beereedku, taas oo marka dambe sababta in uu dalagu dhinto.

Dunida weli lama hindisin saacado ama qalab digniineed kaas oo warbixin buuxda ka siin kara aadanaha khatarta iyo mugga abaarta inta aysan imaan kahor.

Balse, taasi kama dhigna in aanan qorshe laga yeelan karin ama aan la qaadi karin tallaabooyin lagu yareynayo waxyeellada abaaraha ka hor inta aysan dhicin, marka ay billaabato ama marka ay abaartu dhacdo kadib.

Tusaale, waddamada qaar waxa ay leeyihiin Xarunta Qaranka Ee Ka-hortaga Abaaraha taas oo dadka ka caawisa in ay dejistaan qorshe abaareed inta aysan abaartu dhacin kahor si sare loogu qaado awoodda ka jawaabidda abaarta.

Abaaraha lagama hortegi karo waayo waa musiibo dabiici ah, balse waa lala tacaali karaa oo waxaa la yareyn karaan saameynteeda.

Qaababka ama siyaabooyinka loola tacaali karo abaarta waxaa ka mid ah:

1- In biyo dhaamin loo sameeyo dadka ay abaaruhu sameeyeen.

2- In dadka ay abaaruhu saameeyeen loo qodo ceelal, barkado, ama loo hagaajiyo harooyinka ay biyuhu galaan xilli roobaadka.

3- In loo daabullo/raro calafka ay xooluhu cunnaan.

4- In dib u dejin loo sameeyo dadka abaaraha ka soo qaxa, marka ay magaalooyinka soo galaan.

5- In la baro ama laga caawiyo qaababka ay xoolaha ugu beddelaan karaan lacag si aysan xooluhu ugu dhammaan abaarta, haddii ay dhacdana loo helo hanti nolosha lagu sii maareyn karo.

6- In dib u celin loo sameeyo dadka abaaraha kasoo barokacay abaarta kadib, iyada oo loo gadaayo xoolo wixii la awoodo, illeen nolosha baadiyaha lagama maarmo dhaqan iyo dhaqaale ahaanba.

7- In qoysku isku qaybiyaan qaar miyiga degan iyo qaar magaalada degan, si kuwa magaalada degani u caawiyaan kuwa miyiga degan xilliga abaaraha iyo markii baahi jirto, ama ay qoysku isku qaybiyaan xoola-raacato/dhaqato, beeraleey iyo kalluumeysato waa haddii ay suurtogal tahay.

8- In biyo-xireenno la sameeyo si looga faa'ideysto biyaha roobka ay togaga iyo webiyadu wadaan ama in dayactir lagu sameeyo kuwii horay u jiray.

9- In la xalliyo khilaafaadka dhex yaalla dadka deegaan wadaagta ah, si ay nabad ugu wada cabaan biyaha ama ay ugu hayaamaan/guuraan meelaha laga heli karo biyo iyo daaq markii ay abaari jirto iyaga oo aan u baqeyn naftooda iyo duunyadooda.

10- In heshiisyo lala galo waddamada ay biyahu nagala dhexeeyaan ama aan biyo wadaagta nahay.

Tusaale, labada webi oo ay nolosha Soomaalidu inta badan ku tiirsan tahay biyo ahaan waa webiga Jubba iyo kan Shabeelle.

Labaduba waxa ay ka yimaadaan waddanka Itoobiya (surface water) oo ah dal aan deris nahay.

Itoobiya oo qaatay siyaasadda isku filnaanshiyaha cuntada, waxa ay ku howlan tahay in ay fuliso mashaariic waaweyn oo biyo-xireenno ah, si ay kor ugu qaadaan waxsoosaarka beerahooda, taasina waxa ay dhib weyn oo biyo la'aan ama biyo yaraan ah ku keeni kartaa Soomaalida ku nool biyahaas (dad iyo duunyo).

11- In la sameeyo habab biyaha wasaqeysan ama horay loo isticmaalay dib loogu nadiifiyo si mar kale dib loogu isticmaalo (Water Recycling).

12- In lala yimaado qaabab biyaha cusbada ah ee dhulka oogadiisa saaran ama badda ku jira oo lagu tiriyo biyaha ugu badan (97%), loo cusba saari lahaa oo looga dhigi lahaa biyo macaan oo la cabi karo ama beeraha lagu waraabsan karo (Desalination).

13- In siyaasad laga yeesho sidii loo yareyn lahaa wasaqoobidda biyaha, waayo haddii ay biyaha oogada dhulka saaran ama dhulka hoostiisa ku jira (ceelasha) wasaqoobaan waxaa adkaan doonta in la isticmaalo xilliga abaaraha hadii la isticmaalana waxaa ka dhalan karan cudurro dilaa ah oo dadka iyo duunyadaba galaafta.

14- In sanduuq lacageed loo sameeyo la tacaalidda iyo wax ka qabashada abaaraha.

15- In sare loo qaado isku duubnaanta iyo isku diir-naxa dadka Soomaaliyeed dhexdooda si ay isku caawiyaan xilliga abaaruhu dhacaan.

16- In la dhiso ama la tayeeyo hay'adaha ka shaqeeya la tacaalidda ama yareynta saameynta abaaraha.

17- In la talaalo dhirta asalka u ah waddanka (native) waayo dhirtani waxa ay u baahan tahay biyo ka yar kuwa ay u baahan yihiin dhirta dibadda laga keeno ee aan asal ahaan ka bixin geyiga Soomaalidu degto.

18- In qaabka ay wax u beertaan beeraleydu wax laga beddelo iyada oo la barayo beeraleyda qaababka kala duwan ee wax loo beerto iyo xilliyada dalag kasta la beerto. Tusaale, waa in beeraleyda lagu dhiirriggeliyo in ay beertaan dalaga adkeysiga u leh kuleylka iyo abaaraha xilliga ay abaartu jirto ama la saadaalinayo. Sidoo kale, waa in lagu baraarujiyo beeraleyda in ay beertaan dalaga ku habboon xilli cimileedka markaa lagu jiro si waxsoosaarka sare loogu qaado (mono-agriculture).

19- In laga hortago jaritaanka iyo xaalufinta dhirta taas oo Soomaaliya ka dhigeysa dhul lama-degaan ah haddii aan si deg-deg ah wax looga qaban.

20- In la dhiirriggeliyo hay'adaha aan dowliga aheyn iyo ururada bulshada ee u ololeya ilaalinta deegaanka.

21- In la diiwaangeliyo saameynta ay abaartu ku yeellatay dadka, xoolaha, dalaga, iyo dhaqaalaha, iyo deegaanka IMW.

Waxaa xiriir dhow ka dhexeeyaa abaaraha, fatahaadaha, iyo isbedelka cimilada oo ah khatarta cusub ee aadanaha oo dhan la tacaalida uga baahan waqtiga la joogo. si loola tacaalo abaaraha waa in si dhow loola socdaa isbeddelka cimilada lana aas-aasaso hay'ado ama wasaarad qaabilsan isbedelka cimilada. Sidoo kale, waa in jaamacadaha dalka lagu baraarujiyo in ay manhajkooda waxbarashada ku soo daraan ama ay tayeeyaan takhasusyada lagu barto isbeddelka cimilada, beeraha, xannaaneyta xoolaha iyo la

tacaalidda musiibooyinka dabiiciga ah sida abaaraha, fatahaadaha, duufaanada, dabeylaha iwm.

# Ka-Qeyb Galki Madaxweynaha JFS meertada 77ad ee Golaha Q.M.

15/09/2022 Madaxwynaha Jamhuriyadda Federalka ee Soomaaliya Dr **Hassan Sheekh** Maxamud ayaa booqasho rasmi ah ku tagey dalka Mareykanka, halkaas uu kaga qayb gelayey meertada 77aad ee shirweyanaha Qaramada Midobey "United Nation General Assembley77", 16/09/2022, madaxweyaha JFS Dr Hassan Sheekh ayaa booqday Wasaaradda Difaaca Mareykanka, halkaas uu kulan kula qaatay Xooghaya Difaaca dalkaas, **LIyord J. Austin**,



Madaxweynaha J.F.S Dr Xasan Sheekh Max'ud iyo Wasiirka Gaashaandhigga USA LIyord J.AUSTIN

oo ay kawada hadleen iskaashiga labada dhinac, adkaynta ammaanka iyo taakulaynta dawladda Mareykanka si looga adkaado argagixisada.

Isla maalintaas Madaxweynaha JFS ayaa la kulmay Madaxweyanaha Bangiga Adduunka “World Bank”, **David Malpass** oo uu kala hadlay in laga taageero dib u habaynta kaabayasha dhaqaalaha Soomaaliya, barnaamijka deyn cafinta iyo in lagu saleeyo mashaariicda baahiyaha taagan sida abaaraha, Madaxweyanaha JFS ayaa sido kale kulan la qaatay Madaxda Hay’adda Lacagta Adduunka IMF, **Kristalina Georgieva**, wadahadalkooda waxaa diiradda lagu saaray in lasii wado dib u habaynta kaabaysha dhaqaalaha si loo gaaro ilaa marxaladda ugu dambaysa ee deyn cafinta.

17/09/2022 Madaxweyanaha JFS MD Dr Xasan Sheekh ayaa kulan la qaatay Xooghayaha Arrimaha Dibadda Mareykanka **Antony Blinken,** oo ay ka wada hadleen xiriirka diblomasiaydeed, iskaashiyada amni iyo dhaqaale ee soo jireenka ah ee labada dal.



*Madaxmweyaha JFS DR Xasan Sh. Maxamuud oo jeedinaya khudbadda.*

22/09/2022, Madaxweyaha JFS ayaa khudbad dhinacyo badan taabanaysa ka jeediyey Golaha Qaramada Midoobey.


Madaxweyanaha ayaa xusay arrimaha:

1. Abaaraha: MW ayaa khudbadiisa ku sheegay saamaynta ba'an aya abaaruhu gaarsiyeen shacabka Soomaaliyeed, taaso ku dhow heer macaluul isu bedesho, madaxweyanaha ayaa baaq u diray dhammaan dadka Qurbajoogta (Diaspora) da Soomaaliyeed iyo walaalaha caalamka si

looga hortago abaarta baahsan ee ku habsatay shacabka Soomaaliyeed

2. Isbedelka cimiladda: MW JFS ayaa sheegay in isbedelka cimiladu yahay dhibaato caam ah Soomaaliyana ay ka mid tahay dalalka u nugul, madaxweynaha ayaa sheegay in dawaladdiisu markii u horeysay sameysay wasaarad u gaar ah arrimaha is bedelka cimillada iyo ilalinta deegaanka, si ay u hoogaamiso dadaalladda looga hortegayo isbeddelka cimillada, madaxweynaha ayaa sidoo kale khudbadiisa ku sheegay in aan Soomaaliya keligeed ka adkaan karin isbeddelka cimillada ilaa adduunka oo dhan si wadajir ah uga hortegin saamaynta isbedelka cimilada.
3. Argagixisada: MW JFS ayaa xusay in aan argagixisadu lahayn wax diin ah, sidoo kale bulshadana aanku dhex lahayn wax qiime ah, ayna yihin dembilayaal xasuuqna u geysta dad aan waxba galabsan, loogana adkaan karo isku duubni iyo in meel loogasoo wada jeesto argagixisada, "ma jirto meel lagu sheegay adduunka urur argagixiso oo ka adkaatay dawlad iyo shacab midaysan". MW JFS ayaa xusay in dawaladda iyo maamul goboleedayadeeda iyo shacabka oo ay garab ka helaya hawl-galka Midowga Africa "ATMIS" ay wadaan dadaallo logula dagaalamayo argagixisada looguna tagayo goobaha ay ku dhuumalaysanayan.

Madaxweynaha ayaa sidoo kale intuu ku guda jirey safarkiisii Mareynkanka kulamo gaar gaar ah la qaatay qaar ka mid ah madaxweynayaasha caalamka sida: Madaxweynaha Mareykanka **Joe Biden**



*Madaxweynaha J.F.S DR Xasan Sh. Maxamud iyo MD Joe Biden*

Madaxweynaha Sudan **Abdel-Fattah Al Burhan**, Madaxweyanaha Slovenia **Burot Pahor,** iyo Boqor **Adallah**a dalka Urdun, iyo kuwa kale, sidoo kale madaxweyanaha ayaa kulan la qaatay qaybo kala duwan oo ka mid ah Jaaliyadda Soomaliyeed ee oo uu uga warbixiyey xaaladda guud ee Dalka.

Madaxweyanaha ayaa sidoo kale la kumay Xogahaya Qaramada Midoobey **Antonio Guterres,** oo ay ka wada hadleen dadaaladda lagula tacaalayo abaaraha, la dagaalanka argagixiso iyo taageerada bini'aadanimo ee loo baahanyahay.



*Madaxweynaha J.F.S Dr Xasan Sh. Maxamud iyo Xoghayaha Guud ee QM Antonio Guterres*

Sida lagu sheeagay wararka dunida iyo kuwa waddanka in MD Dr Xasan Sh. Maxamud uu kalasoo noqday New York balanqaadyo caalamku uga jawaabayo qodobadii uu ku muujiyey khudbadisii taariikhiga ahayd ee QM iyo kulamadiisii bar bar socday.

Shaxcabka Soomaaliyeed wuxuu si dhow ula socday dadaalka madaxweynaha iyo juhdiga uu saarayey muujinta dhibaatooyinka ka jira dalka taas oo shacabku ku ammaanay kuna garab taaganyahay.

# Qaraxii Zoobe 29 Oktoobar 2022

29-ka Octoobar sanadka 2022 waxaa Isgoyska Zoobe ee Magaalada Muqdisho ee caasimada Soomaaliya ka dhacay qarax aad u xooggan oo noqday kii labaad ee isla Zoobe uguna dhimashada badnaa weeraradii iyo qaraxyadii ka dhacay guud ahaan Soomaaliya.

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ka tacsiyeeyey Qarixii Zoobe

Oktoobar 29 Oktoobar 2022 Madaxweynaha J.F.S Mudane DR Xasan Sheekh Maxamuud ayaa ka tacsiyeeyey muwaadiniinta Soomaaliyeed ee birmo-geydada ahaa ee argagixisada Alshabaab ay ku xasuuqeen isgooyska Zoobe ee magaalada Muqdisho. Madaxweynaha ayaa yiri:- “Maalinba maalinta ka danbaysa waxaa sii caddaanaysa arxan-darrada iyo cadaawadda khawaarijta Alshabaab ay u hayaan qof kasta oo Soomaaliyeed. Qaraxa, dilka, xabadda la riday, ceelka la gubay, Masaajidka la dumiyey, maatada la gumaaday, dhammaan lacagta aad bixisaa qeyb ka ah ogoow, qofkii Alshabaab lacag siiyoow".

Madaxweyne DR Xasan Sheekh Maxamuud ayaa xusay ahmiyadda ay leedahay in culimada Soomaaliyeed ay si cad ugu oogeen xujada khawaaarijta Alshabaab, dhacdadaan ayaa daaha ka rogtay qiil kasta oo ay ku hoos gaban jireen, kagana been abuuran jireen diinteenna suubban ee Islaamka.

"Maanta ma jiro hal qof oo shaki uu kaga jiro qorshaha rasmiga ah ee argagixisada Alshabaab in uu yahay xasuuqa iyo gumaadka dadkeenna, goob kasta iyo goor kasta, laakiin taasi uma hirgaleyso, idam Alle, dalkana waan ka sifaynaynaa” Ayuu yiri.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa Alle uga baryey dhammaan muwaadiniinta ku shahiiday qaraxyada argagixisanimo ee kooxdan khawaarijta ahi kula beegsadeen Zoobbe in uu fadhigooda ka yeello Jannatul Firdowsa, inta dhaawacyada ahna uu siiyo caafimaad degdeg ah.

30 Oktoobar 2022 Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya DR Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa gaaray isgooyska Zoobe ee magaalada Muqdisho si uu ugu kuur galo baaxadda dhibaatada xooggan ee ka dhalatay qaraxyadii arxan darrada ahaa ee argagixisada Khawaarijta Al-shabaab ay ku gumaadeen muwaadiniinta birmu-geydada ah ee ku sugnaa goobtaas.

Madaxweynaha oo ku suganaa burburka dhismaha Masaajid ku dumay qaraxyadan argagixiso ayaa tilmaamay in weerarkan bahalnimada ah uu sababay dhimashada tobonnaan qof oo ku tukanayey masaajidkan, taas oo ka mid ah dhacdooyinka naxdinta leh ee laga diiwaan geliyey.

“Dadkeennaan la xasuuqay ee birmu geydada ah, waxaa ku jiray hooyooyin ilmahooda dhabta ku haysta, aabeyaal xaalad

caafimaad u socday, arday waxbarasho loo soo diray, ganacsato la daalaa-dhacaysay nolosha qoysaskooda, macallimiin iyo dhakhaatiir u adeegayey dadkooda. Qofka intaas xasuuqay, maxuu yahay qiilka uu u haysto, diinta uu daliishanayo iyo dadnimada uu sheegan karo".

Madaxweyne DR Xasan Sheekh ayaa faray Xukuumadda in gurmad caafimaad oo deg deg ah ay u fidiso dadka dhaawacyadu ay soo gaareen, qaarka xaaladoodu ay culustahayna loo diyaariyo gargaar caafimaad, si degdeg ahna ay ugu shaqeyso isku duburidka gurmadka shacabka Soomaaliyeed ee ka murugeysan xaaladdan adag.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa ugu baaqay dhammaan dadka Soomaaliyeed in ay u istaagaan samata-bixinta dadkooda ku dhibaatoobay qaraxyadan argagixiso, loona midoobo sidii gurmad iyo daryeel ay u heli lahaayeen qoysaska, ubadka iyo waalidiinta ay inooga ka tageen muwaadiniinta ku shahiiday qaraxyadan murugada leh.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa sidoo kale bogaadiyey sida qaybaha kala duwan ee shacabka Soomaaliyeed ay dhiigga ugu deeqeen dadkooda; biyaha iyo cuntada, dharka iyo agabyada kale ee muhiimka ah ay u la gaareen dhaawacyada, isaga oo dhankiisa ku deeqay dhiig si uu u dhiirri geliyo olalahan gurmadka qaran.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Sheekh Aadan Maxamed Nuur (Madoobe) ayaa si kulul u cambaareeyay qaraxyadii lala beegsaday dad shacab ah oo marayey wadada Zoobe ee Magaaladda Muqdisho, taasoo cadeyneysa cadowtinimada kooxda khawaariijta ah ee uu gabalkoodu sii dhacayo.

Guddoomiyaha ayaa dhammaan Shacabka Soomaaliyeed uga tacsiyadeeyay falkaasi wuxushnimada ah, dadkii halkaasi ku shahiiday ayuu Alle uga baryay inuu naxriistiisa Janno ka waraabiyo, kuwii ku dhaawacmayna uu caafimaad deg deg ah siiyo.

Ugu dambeyn Guddoomiye Sheekh Aadan Madoobe ayaa Ummadda Soomaaliyeed ugu baaqay in ay meel uga soo wada jeestaan sidii loo cirib tiri lahaa kooxdan arxanka daran ee caadeysatay gumaadka Ummadda Soomaaliyeed.

**GURMADKA XUKUUMADDA QARAN EE QARAXII ZOOBE 29-kii Oktoobar 2022:**

Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka, Mudane Hamza Cabdi Barre ayaa 30/10/2022 shir guddoomiyay shir Golaha Wasiirrada oo degdeg ah oo looga hadlayey gurmadka dadkii ku waxyeeloobay qaraxyadii ay shaley magaalada Muqdisho ka

geysteen kooxaha Khawaariijta ee magaca diinta Islaamka ku qaraabanaya. Waxaana ka soo baxay qodobaddan soo socda.

1. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay lacag dhan hal million oo dollar ku deeqday sanduuqa gurmadka wax loogu qabanayo dadkii ku waxyeeloobay qaraxyada waxashnimada ah ee argagixisada khawaarijtu ku beegsadeen dad shacab ah oo aan waxba galabsan.

2. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay kafaala qaadeysaa daweynta iyo daryeelka dadka ku dhaawacmey qaraxyadii shaley ee KM5 (Zoobe).

3. Waxaa kale oo Goluhu isku raacay in la kafaala qaado waxabarashada carruurta ay ka tageen shuhaddadii ku nafweysay qaraxyadii shaley, iyadoo laga ambaqaadayo balanqaadkii uu jeediyay Madaxweyne DR Xasan Sheekh Maxamuud markii uu booqday maanta goobta uu qaraxu ka dhacay.

4. Waxaa xukuumadda ay fareysaa Wasaaradda Waxbarashada iyo Hiddaha in muddo saddex maalmood ah la fasaxo goobaha waxbarashada si ay waqti ugu helaan ardeyda sii wadista hawlaha gurmadka socda ee loogu gargaarayo dhibbaneyaasha weeraradii dhacay.

5. Waxaa dhammaan Wasaaradaha iyo hay’adaha kale ee dowladda la farayaa inay si buuxda uga qeyb qaataan gurmadka socda.

6. Waxaa Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay ku dhawaaqeysaa qaadista talaabooyin cad cad oo amniga lagu sugayo, lana sameynayo isbeddelo degdeg ah oo la jaanqaadaya xaaladda dalka ka jirta.

7. Waxaa uu Golaha Wasiirrada si xushmada leh uu shacabka Soomaaliyeed uga codsanayaa inay yeeshaan feejignaan dheeri ah, samir, dulqaad iyo adkeysi inta lagu guda jiro hawlgalka lagu ciribtirayo cadowga khawaarijta oo dhammaan goobihii ay isku fara saareen Ciidammadda Qaranka iyo shacabka taageeraya looga adkaadey, sidaa darteedna ay iyagoo naf la caari ah isku dayayaan inay beegsadaan shacabka masaakiinta ah.

8. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay mar kale balanqaadeysaa in Khawaarijta dalka laga cirib tirayo, isla markaana ay Ciidammada Qalabka Sida sii wadi doonaan gulufka guulaha badan laga gaarey, kaas oo khawaarijta lagu gaarsiiyay khasaare ballaaran.

9. Waxaa kale oo uu Golaha Wasiirrada isku afgartey in dib loo yagleelo Bankiga Kaydka Dhiigga ee heer qaran si sare loogu qaado adeegga caafimaadka ee shacabka Soomaaliyeed.

Goluhu wuxuu mar kale tacsi u diray qoysaska, ehelada iyo shacabka Soomaaliyeed ee ay ka baxeen shuhaddadii shaley ku naf waayey weerarada waxashnimada ee naf lacaariga khawaarijta ku qaadeen goobaha rayidka, iyadoo dhinaca kalena

mahad celin loo jeediyay dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada ee isku xilqaamey gurmadka qaraxyadii ka dhacay KM 5.

Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xamse Cabdi Barre ayaa magacaabay guddi ka shaqeeya hawlaha gurmadka ee qaraxii KM5.

Ra’iisul Wasaaraha oo xiganaya qodobada 99 iyo 100 ee Dastuurka KMG ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kana jawaabaya baaxadda khasaaraha ka dhashay qaraxii ka dhacay Isgoyska KMG iyo mudnaanta ay leedahay in daryeel degdeg ah loo fidiyo dhibbanayaashii waxyeelladu ka soo gaartay qaraxyada, wuxuu magacaabay Guddi Heer Qaran ah oo shaqeyn doona tan iyo inta laga soo gabagabeynayo hawlaha gurmadka.

## Gudoomiyaha Gobolka Banaadir oo baaq u diray isbataalada Muqdisho

Guddoomiyaha Gobolka Banaadir Yuusuf Xuseen Jimcaale ayaa ugu baaqay isbataalada Muqdisho in si lacag la'aan ah ay ku daweeyaan dadkii ku dhaawacmay qaraxyadii shalay ka dhacay magaalada Muqdisho.

Gudoomiyaha ayaa sidoo kale sheegay in ay baaritaan ku sameyn doonaan highwayrka sheegaya in isbataalada qaar ay lacago waydiiyeen qaar ka mid ah dadkii dhiiga shubayay.

Guddoomiyaha gobolka Banaadir Yuusuf Xuseen Jimcaale ayaa sheegay in haddii ay run noqoto arrintaasi lala xisaabtami doono isbataaladaasi.

14-ka Octoobar sanadkii 2017-kii waxaa isgoyska Zoobe ee Magaalada Muqdisho ee caasimada Soomaaliya ka dhacay qarax aad u xoogan oo noqday kii ugu dhimashada badnaa weeraradii iyo qaraxyadii ka dhacay guud ahaan Soomaaliya, sidoo kale 29 Oktoobar 2022 waxaa isgoyska Zoobe ee Magaalada Muqdisho ka dhacay qarax wuxuuna gaysta qasaarihii kii 2017 mid ku dhow, waxaana lagu qiyaasay inuu yahay qarxii labaad ee Soomaaliya ka dhaca oo ugu qasaaraha badnaa.

**Qaraxii** 14 Ortoobar 2017, Dhimashada = 600, Dhaawacu = 1000.

**Qaraxii** 29 Oktoorab 2022, Dhimashadu = 121, Dhaawacu = 300.

Hey’adda Cilmibaarista Badaha waxaa uga mid ah Guddiga Gurmad Qaran MD. Captan Maxamuud Cali Raage, Ag. Waaxda Cilmibaarista, qaybta Badmaridda (Navigation) iyo Dekadaha. Hey’addu waxay weli Diyaar u tahay inay ka qaybqaadato Gurmadka wixii uga soo aado.

# Qeybta 4aad

## WAXYAABO KALA DUDUWAN

# AKHYAARTA GEERIYOOTAY SANADKAN 2022

## I. Abwaan Hadraawi (1943-2022)

Maxamed Ibraahim Warsame oo ku magac dheer (Hadraawi), waa mid ka mid ah tiirarka fanka Soomaalida, waa abwaan ku caan baxay curinta Heesaha iyo Gabayada.

Maxamed wuxuu ku dhashay magaala madaxda gobolka Togdheer ee Burco sanadkii 1943kii, Maxamed Ibraahim markii uu 10 jirka ahaa wuxuu aaday dalka Yemen isagoo waqtigaa laga billaabo la nolaa adeerkiis.

Halkaas ayuu ka galay dugsi Qura'aan, iyadoo magaca uu ku caan baxay ee Hadraawi uu halkaa uga baxay, waraysi uu bixiyay ayuuna ku sheegay magacu inuu asal ahaan ahaa (Abuu Hadra) oo uu macallinkii dugsigu u bixiyay, maadaama uu ahaa nin ardayda aad ugu sheekeeya misana ka qosliya. Markii uu dugsiga ka baxayne wuxuu macallin ka noqday mid kamid dugsiyada hoose ee dalkaYemen.

Markii ay Soomaaliya xornimada qaadatay, Gobollada Woqooyi iyo Koofurna ay midoobeen, Hadraawi Yaman wuu kasoo tagay isagoo dib ugu soo laabtay dalkiisa hooyo gaar ahaan magaala madaxda Muqdisho, isagoo halkaas mar kale noloshiisa ka billaabay, wuxuu ku biiray Jaamacadda Umadda, ka qalin jebiyay oo isla iyadana uu bare (macallin) ka noqday, iyadoo ay bar-bar

socotay inuu la shaqaynayay Wasaaradda Warfaafinta iyo Raadiyo Muqdisho.

Hadraawi oo noqday gabyaa iyo heeso curiye caan ka ah bulshada dhexdeeda wuxuu ahaa nin aad uga soo horjeeda maamulkii militeriga ahaa, heeso iyo gabayo kasoo horjeeday maamulkii dalka oo uu tiriyay darteed ayaa sababtay in xabsiga loo taxaabo, waxaana lagu xeray magaalada Qansax Dheere oo ah magaalo 90km dhanka Koonfur Galbeed ka jirta magaalo madaxda Gobolka Bay ee Baydhabo, wuxuuna xabisag ku jiray 5 sano (1973 ilaa 1978).

Hadraawi markii uu xabsiga kasoo baxay wuxuu kamid noqday maamulka Akadeemiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta.

Xilliyadii billowga burburka iyo dagalladii sokeeye Hadraawi wuxuu aaday Dalka Ingiriiska isagoo kaddibna safarro kusoo maray inta badan waddamada Yurub iyo Maraykankaba, wuxuuna ka qayb galay xaflado faneed lagu dhigayay waddamadaas, 1999-kii Hadraawi wuxuu kusoo laabtay Hargeysa.

Heesaha ugu caansan ee lagu xasuusto Hadraawi waxaa kamid ah: **Baladwayn** oo uu qaaday fannaanka Xasan Aadan Samatar. **Hooyo** oo uu qaaday Allaha u naxariistee fannaankii lagu magacaabay boqorka codka Maxamed Saleebaan Tubeec. **Jacayl Dhiig Malagu Qoray** oo iyadana ay qaadday Allaha u naxariistee

boqoraddii codka Xaliima Khaliif Cumar Magool. **Suleekha** oo uu qaaday Allaha u naxariistee fannaankii Maxamed Nuur Giriig. Iyo kuwa kale oo badan.

Qaar kamid ah heesaha uu sameeyayna waxaa lagu turjumay luqado kale.

Gabayadiisana waxaa kamid ah: **Gudgude**, **Daalallay**, **Daba huwan** oo ah gabay aad u dheer kana kooban ilaa 803 tuduc ama bayt. **Silsiladdii Sinlay** oo uu qayb ka ahaa, iyo kuwa kale oo badan.

Maxamed Ibraahim Warsame Hadraawi sanadkii 2012-ka wuxuu ku guulaystay Abaalmarinta Prince Claus Fund oo uu ku mutaystay gabayada iyo heesaha waxtarka u leh bulshada ee uu sameeyay.

Allaha u naxariisto Hadraawi wuxuu ku geeriyooday magaalada Hargeysa 18/08/2022 isagoo jiray 79 sano, waxaana aaskiisa ka qeybgalay dadweyne aad u badan oo isaga kala yimid dal iyo dibadba iyagoo isugu jiray mas’uuliyiin iyo shacab.

## II. Sheekh Yuusuf Cabdallah AL-QARDAAWI (1926-2022):

Sh. Yuusuf wuxuu u dhashay Masar wuxuuna dhashay 9/9/1926, wuxuuna wax ku bartay Jaamacadda AL-AZAR, kana qaatay Darajeda PhD. Kontomadkii.

Sh.Yuusuf wuxuu muddo Macallin ka ahaa isla Jaamacaddii uu ka baxay, hasa yeeshee sheekhu waa ka tagay Dalkiisa Masar markii Dolwaddii MARXUUM Jamaal Cabdinaasir ay ciriirigalisay ayadoo 60 maadkii kuna eedesay inuu ka mid yahay URURKA IKHWAAN AL-MUSLIMIIN, waxaana soo dhaweysay Dowladda QATAR .

Sh.Yuusuf wuxuu noqday Madaxa Kulliyadda Shareecada oo uu muddo dheer hoggaaminayey kulliyaddaas, gacanna wuu ka geystay horumarinta nidaamka waxbarashada ee Dalkaas soo dhoweeyey.

Sh.Yuusuf AL-Qardaawi wuxuu ahaa Caalim weyn oo Islaami ah, cimrigiisana ku bixiyey faafinta Diinta Islaamka gaar ahaan dadka aan Muslimka hore u ahayn. Sidoo kale Sh.Yuusuf wuxuu madax ka ahaa URURRO Islaamka u fidiya cilmi ahaan oo ku firiqsan qaaradaha Dunida, waxaa kale oo Shiikhu qoray kutubo aad u fara badan oo taabanaya farac kasta oo Islaamka xiriir la leh, asagoo weliba aad u soo bandhigaya fikrado muhiiim ah, hadana sahlan xag garasho iyo xag hirgelin.

Waxaan qabaa haddii Sh.Qardaawi uu ku sinaan lahaa qorista kutubaha oo kaliya in gutay waajibkii ay ku lahayd Diintiisu, iska daayi howlaha kale oo tiro dhaafka oo Sheekhu uu waday Sh.Yuusuf wuxuu xoogga saaray isusoo dhoweynta Afkaarta firaqa Islaamka iyo weliba fududeynta fahamka Islaamiga ah, arrintaan Sheekhu waxaa ku soo gaaray Dhaliillo ugu imaaneysay firaqa qaarkood. Sh.Yuusuf AL-QARDAAWI waxaan u rejeyneynaa inuu ahaa Caalim MUKHLIS u ah Diintiisa Islaamka iyo fidinteeda.

Sheekha wuxuu ku geeriyooday Dalka Qatar 26/9/2022.

Sheekheenna Sh.Yuusuf ALLAHA ku abaalmariyo Jannadii Firdowska asagoo la jaal ah Nabiyada, Run badanayaasha iyo Shuhadada, kuwaas oo ah kuwa ugu habboon in lala jaalnoqdo aamin.

# NASASHADA.

## I. XISAAB ISKA FUDUD: (Halxeraale)

1. Haddii bedka dhulku yahay 510 Milyan $km^2$, Biyuhuna ay ka yihiin 70%, Badweynta Hindiyana Biyaha Dunida ay ka tahay 21%, Qaaradda Afrika ay tahay 40% bedka badweynta Hindiya; hadaba keen bedka Qaaradda Afrika?
2. Haddii Bishu (Dayaxu) ay ka fog tahay Dhulka 0.48km, Qorraxdana ay ka fogtahay Dhulka 312.5 jeer fogaanta Bisha ee Dhulka, Mariikha (MARS) oo Qorraxda ka fog yahay 1.6 jeer inta Dhulka ka fogyahay Qorraxda. Haddaba keen inta Mariikhu (Mars) ka fog yahay Dhulka?
3. Haddii Ido, Riyo iyo Digaag ay Mooro (Xero) iskula jiraan tiradoodu tahay 30 Madax, laakiin lugahoodu yihiin 96 lug, lugaha digaagtu waxay la egyihiin Rubac (1/4) tirada guud ee lugaha xayawaanka ku xareysan moorada. Haddaba soo saar tirada nooc kasta ee ku jira Moorada?

## II. XIKMADO:

1. Haddii aadan wax aqoonin weydii kuwo wax yaqaan (Qur'aan).
2. Waxyaalaha laga dhaxlay Nabiyadii hore:

a. Haddii aadan xishooneyn samee waxaad doonto (Xadiith).

3. Hal darbo oo jeydal (garbaash) ah waxay ka waxtar badantahay 1,000 waano (Kunfu-yus-Feylasuufkii Shiinaha), Qarnigii 6aad Nabi Ciise (CS) ka hor.
4. Nimaan shaqeysanin shaahi ma cabo (howraar ku buurineysa wax soosaarka).
5. Howshaada maanta Berri ha u dib dhigin (Xikmad Guud).
6. Ul ninkii dheer ayay madaxa ka dhifataa (Masuuliyadda ayay tilmaamee).
7. Intaadan falin ka fiirso (Xikmad Guud).
8. Haddii dani Dumar kaa gasho, dulqaad ha u deymo la'aanin.
9. Nin Dumar badanaa ayaa yiri: Ragow guurso mid keliya ama doobnimo ku noolaaw.
10. Nin waxtar leh, Naag waxtar leh ayaa ka dambeysa.
11. Badi waa barwaaqo haddii aad beerato.

## III. (Dhoolacaddeyn)

1. Kuwo Soomaali ah oo ku noolaa magaaladda Jidda ee Dalka Sacuudiga, Iqaamana aan laheyn ayaa jidka laga aruuriyey. Markii la soo qabqabtay ayaa waxaa la weydiiyey su'aalahaan: waa immisaa arkaanta Islaamku?

Waxey ku wada jawaabeen waa shan, waana tiriyeen, dabadeed waxaa lagu uruuriyey Baabuur Shabaqle ah oo ay wateen askartu. Mid ugu dambeeyey ayaa la weydiiyey isla su’aashii? Wuxuuna ku jawaabay: ARKAANTA ISLAAMKU WAA LIX, Wuxuuna ku lixeeyey IQAAMADA. ASKARTII ayaa yaabtay oo ku yiraahdeen ninkii: sidee iqaamad aad ugu lixeeysay ARKAANTA ISLAAMKA. Wuxuuna ugu jawaabay: Halkaan shanta arkaan ee Islaamku waxba kama goyso ee Iqaamo ayaa wax gooyso, sidaas ayaan ugu lixeeyey. Sheekadu waxey leedahay! Askartii aad ayey u qosleen, weyna iska sii wada deeyeen dhammaan raggii ay qabqabteen.

2. Oday reer baadiyo ah ayaa yimid magaalo, waxaana la geeyey cid sab (waliimo) qabta oo xuseysa Nabiga (cs). Ninkii reer baadiyaha ahaa ayaa yiri: Nabiga maalin kasta la leeyahay ALLA NAGU xiriiriyo miyaan nooleyn. Nin dhintay sidee wax loola qabsan kara.
3. Oday waxgarad ah ayaa yimid masaajid uu

kutubo ka akhriyo sheikh cilmi badan aadna aftahan u ah; wuxuu la yaabay ninkii cilmiga sheekha, wuxuuna ogaaday in sheekhu gacan ay ka go’an tahay. Markaas ayuu ku dhawaaday sheekhii kuna yiri, “Cilmigaaga waan la cajabay, laakiin gacantaada ayaa I shaki gelisay. Wuxuu ka wadaa odagu: wadaadku wuxuu ahaa TUUG,

sidaasna looga gooyey gacanta, sheekhu wuu gartay wuxuuna ku yiri, “Gacantu waa BIDIX”.

4. Faarax Gololey ayaa u tegay Jaale M. Siyaad oo ay la joogan ku-xigeennadiisa G/S Ismaaciil Cali Abukar iyo madax kale; Ismaaciil ayaa yiri:- Jaale Siyaad: “Ninkaan F. Gololey waa dib u socod”. Jaalle Siyaad ayaa ku yiri,

Faarax u jawaab Ismaaciil. Faarax wuxu yiri, “Kacaanka ka hor Ismaaciil wuxuu masruufan jiray 20 shilin Somali/maalintii, anigana 100 shilin/maalintii, haddana Ismaaciil wuxuu masruuftaa maalintii 200 Sh.So. halka aniga aan manta masruufto 10 Sh.So. sidaas ayaan ku ahay Dib u socod, Ismaaciilna ku yahay horusocod”. Faarax wuxuu ku soo gunaanaday hadalkiisi: Arrinta Horusocod iyo Dib u socod waxaa lagu qiyaasaa xaaladda dheriga iyo caloosha.

5. Oday iyo xaaskiisa ayaa wada cunaayey soor galley ah oo xoogaa caano ah jirridda uga jiraan. Xaajiyadii ayaa damacday inay hesho caanaha intooda badan, waxay god ka qoday hoosteeda, waxay soo jeexday kanaal ay caanihii ku soo shubmeen; waxeyna tiri, Oday: weer aad I tiri Maalin hore Qalbigeyga ayey ku xariiqan tahay. Duqii oo fahmay xaajiyada ayaa isku qasay caanihii iyo soortii, wuxuuna ku yiri:

Habaroy waxaa naga dhexeeya waa Qasaney-labaney. (Caanihiina soortii ayey wada gaareen).

6. Niman safar ahaay ayaa meel degay weyna ku hurdeen. Subixii ayaa mid ka mid ahaa safarkii ayaa waxuu ka dacwooday in xalay laga cunay Oodkacii uu sitay, waxaa lagu heshiiyey in la uriyo gacmaha safarka oo dhan waxaana laga helay nin, hase yeeshee ninkii gacantiisa laga uriyey Oodkacii ayaa booday oo ableey soo qaatay wuxuuna ku yiri safarkii: ***waxaan doonayaa ninkii gacanteyda ku cunay Oodkaca dadka islaameed.***